

# ***Qoraalada dhiirogelinta Ruuxa***



## ***Buugga is-caawinta Qaxootiyada***

*Ka soo kabsashada dhaawacyada,  
warbixinta iyo tababarada*

*Qoraalka: Anne-Margret Wild*

*Jaantusyada: Jeanette Niqué*

*Sawirada: Josef Schechner*

*Jarmalka ku Ingiriis: Ramey Rieger*

*Ingiriis ku Somali: Abdi Yussuf Abdi*

*Waxaa daabacay:*



**1. Auflage in Somali 2017**

**Herausgegeben vom**

**TraumaHilfeZentrum Nürnberg e.V.**  
Glockenhofstraße 47  
90478 Nürnberg  
[www.thzn.org](http://www.thzn.org)

**illustriert von Jeanette Niqué**



[www.ateljoe.de](http://www.ateljoe.de)

**Ausmalbilder: Sabine Fischer**

**Fotos: Josef Schechner**  
<https://500px.com/josefschechner>

**Covergestaltung: Barbara Mutzbauer**

**Wenn Sie dieses Buch nutzen und einsetzen, würden wir uns über eine Rückmeldung und eine Spende zur Ermöglichung weiterer Übersetzungen und Druckauflagen freuen!**

Schreiben Sie an: [selfsthilfebuch@gmail.com](mailto:selfsthilfebuch@gmail.com)

Spenden unter dem **Stichwort „Selbsthilfebuch“** bitte überweisen an:

**TraumaHilfeZentrum Nürnberg e.V.**  
Deutsche Apotheker- und Ärztebank,  
IBAN DE 20 300 6060 1000 38 53 705

**Jadwalka tusmooyinka:**

<b>Hordhac:</b> Ku soo dhawow Jarmalka!	4
<b>Hordhaca: Ee qofka loogu talogalay buugga? Iyo sida ay u caawin karto?</b>	4
<b>Sadarka 1: Maxaa igu dhacay? – Warbixin muhiim ah</b>	6
1.1. Marka ruuxa dhibaatoodo – Dhaawaca	6
1.2. Maxaa sababo dhibaatada ruuxa daran? – Dhacdooyinka naxdinta <i>Weecashada: Awooda qiyaliga</i>	8
1.3. Maxaa ka dhaca maskaxdeyda inta lagu jiro dhacdada naxdinta iyo sida midaas ay ii saameysay? – Natiijooyinka cilmi baarista maskaxda, cudurka naxdinta muragada la soo dhaafay (PTSD) iyo aastaamaha murugada	10
1.4. Dhibaatooyinka dheeraadka ah iyo xaqiqa muragada lagu daray	24
1.4.1. Murugada	25
1.4.2. Walaaca	26
1.4.3. Xanuunka jirka	26
1.5. Wawa i dhibaateeyo aniga? Maxaa igu sababo xanuunka? Maxaan rabaa inaan badelo? – Shaqsigeyga sahanka	27
<b>Sadarka 2: Maxaa wanaag dareemo? Maxaa i caawiyo? - Kartiyadeyda iyo illaha</b>	31
2.1 Afkaaraha wanaagsan iyo xun waxay leeyihii awood	33
2.2 Waa maxay illaha?	34
2.3 Waa maxay illaheyga gaarka ah? – Raadinta illaha kartida ee tacsida	35
2.4 Waaya aragnimo wanaagsan ee joogitaanka	57
2.5 Ku xiran Halkaan iyo Hadeer - Dhageysiga	60
2.6 Joogtadeyda, amnigeyga!	69
2.6.1. Jadwalkaaga maalin walba ee qaabeysan	69
2.6.2. Sharciyada	73
2.7 Xiriirada bulshada	74
2.8 Wadaagida afkaaraha, muujinta nafsadaada, aasaas ahaanta	76
<b>Sadarka 3: Wawa la sameeyo goorta...? – Ku caawi dhibaatooyinka gaarka ah</b>	77
3.1 Ku adag hurdada iyo/ama hurdada habeenkii	77
3.1.1. Tilmaamaha hurdada wanaagsan ee habeenka	77
3.1.2. Nasinta jirkaaga	82
3.1.3. Nasinta maskaxdaada	85
3.1.4. La kulanka dhaqtarka iyo daawooyinka hurdada	88
3.2. Qarowga	88
3.2.1. Wawa la sameeyo marka aad ka kacdid qarowga	88
3.2.2. Ka hortaga qarowga	92
3.3. Dib u xasuusashada, xasuusaha/sawirada xun ee soo noqnoqanayo iyo la jiritaanka dhinacaaga	92
3.3.1. Dib u xasuusashada	92
3.3.2. Dib u dhaca xasuusaha xun ama sawirada (faragelinta)	96
3.3.3. La jiritaanka dhinacaaga (iska-goynta)	98
3.4. Dagaalka: Is-dhaawicida, xanaaqa, ka xanaajinta iyo rabshad	99
3.4.1. Is-dhaacida	99
3.4.2. Xanaaqa daran, ka xanaajinta iyo rabshad	103
3.5. Dareenka murugeysan, niyad jabinta, dareemaha dambiga	108
3.6. Ku adag diirad saarida iyo maqnaanshaha maskaxda furan	116
3.7. Murugada	117
3.7.1. Heerarka calool xumada	117
3.7.2. Maxaa sii adkeeyaa calool xumida?	118
3.7.3. Maxaa caawin karo?	118
3.8. Weerarada argagaxa	119
3.8.1. Muxuu walaaca nagu sameeyaa iyo maxaa u wanaagsan?	119


3.8.2. Maxaad sameyn kartaa si aad u dabciso weerarada argagaxa?	120
3.8.3. Muxuu walaaca usii koraa marka aan isku dayno inaan ka fogaano	122
3.9. Madax xanuunka	122
3.9.1. Joornaalka Bukaanka	122
3.9.2. Sharaxida xanuunka	123
3.9.3. Nasashada way caawisaa	123
3.10. Qamriga iyo/ama isticmaalka daroogada	125
<b>Sadarka Afaraad: Yaa i caawin karo? Yaan ku leexdaa? – Ciwaanada muhiimka ah</b>	126
4.1. Waa maxay dhaqtarka maskaxda/dhaqtarka cilmi nafsiga? Sidee ayay daaweynta maskaxda u caawisaa?	126
4.2. Ciwaanada iyo qadadka Interneetka	127
4.2.1. La talinta isdhaxgalka bulshada	127
4.2.2. La talinta onleenka isdhaxgalka bulshada	131
4.2.3. Qadadka intarneetka	131
4.2.4. Maxaa caawin karo canugeyga?	131
<b>Qeybta dhammaadka</b>	131
<b>Tusmada jimicsiga</b>	132
<b>Raad raaca</b>	133

## **Hordhaca**

Ku soo dhawow Jarmalka!

Laga yaabo intaa inta badan maqashay midaan, laga yaabo inay jiraan dad kale ee ku direensiyo xumaan. Wuxaan jeelaan lahaa inaan dhaho, "Soo dhawow! Waan ku faraxsannahay inaad halkaan joogtid!" Iyo way wanaagsantahay inaad sameysay illaa iyo hadda. Wuxaad la kulantay waqtii adag ee gurigaada ah iyo waqtiiyo badan oo duulimaadkaaga ah ee Jarmalka ah. Laakin waad sameysay. Waad badbaaday oo waan kuugu faraxsannahay. Laga yaabo inay kugu adagtahay inaad wanaag dareentid ee joogitaanka halkaan hadeer. Gurigaagaayaad aad ugu xiistay, qoyskaaga iyo saaxibadaada. Aad ayaaan dhabitii uga xummahay inay tahay inaad ka tagtid dhammaan inta kaa dambeys. Waan ka xumahay inaad la kulantid iyo si uga soo kabsatid dhammaan cabsidaas, qasaaraha, dhibaatada, rabshada iyo dhimashada. Waan ka xumahay inay tahay inaad iska ilowdid dhammaan riyooyinkaaga ee aad ku badbaadisid noloshaada. Dhammaantood aad ayay u xanuun badan tahay, oo waxaan xooga saaraya dhammaan murugadaada, xanaaqa iyo cabsida.

Iyo weli, waan ku faraxsannahay inaad halkaan joogtid! Wuxaan jeelohay inaad heli kartid cag reebid halkaan, helida aragtiyada mustaqbalikaaga, oo waxaan jeelaan lahaa inaad ku soo biirtid raadinta Halkaagaan iyo Hadeer (hadeer), marka dib ayaad u ogaan kartaa kartidaada, taas oo inta badan tacsida ah iyo ilowga ku saabsan dhammaan guuxa xun oo argagaxa. Wuxaan kuu rajeynaya taageerada (laga yaabo xittaa inuu buuggaan ku jiro) si loo keeno kartiyadaada gadaal ee qoraalada dhiirogelinta! Halkaas ayay joogaan, adiga ku sugayaan, ee mida aan si buuxdo u hubo!




### **Hordhaca: Ee qofka loogu talogalay buugga? Iyo sida ay u caawin karto?**

Buuggaan adiga aaya laguu qoray. Wuxaad u timid Jarmalka sababtoo ah waxaad la dhibaatooneysaa dhibaato daran ee wadankaaga. Sababtoo ah dagaal aaya halkas ka socdo, ama Taliban aaya ku dilayo ama sababtoo ah maleesiyada AL Shabab aaya waxay rabaan inaad u dagaalantid. Sababtoo ah, wadankaaga, waxaa laguugu qasbay inaad hub u qaadid kaligii taliye ama sababtoo ah ma heysatid microoyin badbaado ah ama rajo malahan ee midaas oo badelmeysa waqtii walba si dhaqso ah. Laga yaabo in laguugu qasbi lahaa inaad qof guursatid, ee kasoo horjeedo rabitaankaaga ee wadankaaga. Haddii aad yartahay ama weyntahay, ragga ama dheddiga, dhibaato malahan waxa sababahaaga gaarka ay yihiin ee imaanshaha Jarmalka, waxaan rabnaa inaan ku soo biirno horay usocoshada iyo raadinta qaab nolsha kugu wanaagsanaato halkaan adiga. Si aad u gaartid hadafkaan, waxaan dib u eegi karnaa waxaaga la soo dhaafay, laakin sida dheer ee suurtogalka ah, waxaan jeelaan laheyn inaan diirada saarno Halkaan ama Hadeer, iyo mustaqbalka.

Taasi marwalba ma fudada, waa? Laga yaabo inaad la kulantay sida sawirada ama waaya aragnimada ee waqtigaaga la soo dhaafay, markii ay aad ugu dhowdahay inaad ilowdid, kula qabsadaan adiga. Si sahlan ayay u muuqdaan oo ay la wareegaan, xittaa inkastoo oo aadan u maleynin inay iyaga yihiin gabii ahaanba. Laga yaabo taasi inay tahay sababta aadan u hurdi karin habeenka, sababtoo ah xaalada la soo dhaafay aaya ugaarsado

riyooyinkaaga? Waxay kugu qaadan kartaa saacado inay hurdo ku qabato, sababtoo ah ma damin kartid afkaaraha iyo walaacyada? Laga yaabaa inaad dhibaato kala kulmeysid barashada luuqada, in kastoo aad marwalba aad dhaqso baraneysay oo aad rabtay inaad baratid af Jarmalka sida kugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah? Laga yaabo inaad si dhaqso ah aad u carootid oo aad is xakameyn weyso? Ama waxaad dareentay dambiile sababtoo ah halkaan ayaad joogtaa oo dadka kalena aysan joogin?



iwm.

Laga yaabo inaad ku dhex arkeysid waxyabو nafsadaada ee aadan aqoonsan oo waxaad dareentaa dawaqsanaan, sababtoo ah maadan u baran inaad qaabkaas ahaatid. Iyo tani waxay ku dareensiisaa xumaan.

Waxaan ka hadleynaa isbadeladaan suurtogalka ah ee buuggaan ku jiro. Buuggaan waxaa loogu talo galay inay kugu caawiso fahamka halka isbadeladaan ay ka imaadaan iyo si loo ogaado in saameynadaan ay 'caadi tahay' goortii uu qof la kulmo wixa aad la kulantay. Iyo, dabcan, waxaan jeelaan laheyn inaan u wada helno dooqyo si wadajir ah, ee sida aad ula macaamili kartid oo sare ugu qaadi kartid qaar ka mid ah saameynadaan xun. Tusaale ahaan, sida aad si wanaagsan ugu seexan kartid.

Waxaa jiro qaabab badan oo suurtogal ah oo waxaan sharaxayaa qaar ka mid ah buugaan. Laakin ma jiraan helida sixirka ee islamarkaas caawin karta oo u shaqeyso dadka oo dhan.

Tani waxay la micna tahay si sahlan uma dhihi karo, "Samey midaan iyo midaan oo si wanaagsan ayaad u seexaneysaa isla markaasba." Taasi sababtoo ah waa in qof walba uu kala duwanyahay iyo sidaas darteeda waa in la helaa xalka u shaqeyyo isaga ama ugu wanaagsan. Laakin waxaa jiro xeelado caawiyay dad badan ee daafaha dunida. Qaababkaan waxaa lagu xaqiijiyay daraasadaha sayniska iyo sahanada ee dadka xanuunsanayo, oo sidoo kale way ku caawin karaan, sidoo kale. Waxay u badantahay inaad garaneysid qaababka daaweynta dhaqamada qaarkood ee wadankaaga gaarka ah ka imaanayo ee ku amaahin karo taageero hadeer. Dooqyadaan waxay sidoo kale ku deeqi karaan fududeynta dhibaatadaada hadeer.

Waxyabaha ugu muhiimsan ee aad u baahantahay waa dhiiranaan iyo dulqaad la iskugu dayayo qaabab kala duwan oo lagu helayo xalintaada gaarka ah. Buugaan wuxuu kugu caawin karaa baaritaankaaga adiga oo sharaxayo qaabab iyo micnooyin aad isku dayi kartid. Taasi waxay micnaheeda tahay, looma baahno inaad wax walba ku sameysid buuggaan si markaas wanaag aad u dareentid. Badelkii, waxaad isku dayi kartaa

tababaradaas ee kaa racfaan qaato adiga; inaad qiyaasi kartid nafsadaada oo sameynayo. Weli, waa muhiim inaadan isku dayin kaliya haljeer oo kadib aadan iska dhaafin marka aysan isla markaaba shaqeynin. Maya, waxyaabaha sidaas degdega ah uma shaqeeyaan. Haddii aad dhabitii rabtid inaad wax badesho, waa shaqo adag. Waa sida, tusaale ahaan, dadaalka lagu noqonayo ciyartooy wanaagsan. Waa inaad dhalisaa wax ka badan hal gool, iyo haddii aad ku guuldareysatid marka koowaad, maka niyad jabeysid oo markale ma ciyaareysid. Maya, waa inaad tababarataa oo adag ka hor intaadan u dhalin karin goolal si sahlan. Oo ma jiro qof kale oo adiga kuu dhlainayo goolasha. Waa inaad nafsadaada sameysaa! Laakin tababarahaaga ayaa kuu sheegi karo waxa ay tahay inaad sameysid oo ku tusiyo xeeladaha lagu hormarinayo ciyartaada. Buuggaan waa wax sida tababarahaaga. Waa inaad sameysaa tababarka dhabta ah nafsadaada, inkastoo! Iyo waxaan kuu rajeynaya guulal badan!



### **Sadarka 1: Maxaa igu dhacay aniga? – Warbixin muhiim ah**


#### **1.1. Marka ruuxa dhibaatoodo – Dhaawaca**

Waxaa laga yaabaa waxaad u qarineysaa buuggaan sababtoo ah qof ayaa ku siiyay, rajooyinka oo ah inay kugu caawineyso dareenka wanaaga. Laga yaabo inaad ku ogaatay nafsadaada oo aad furtay sababtoo ah waxaad dareentay sida inaad ku shaqeyneysid hoosta daruuro madow. Sababtoo ah ruuxaaga wuxuu la dhibaatoonaya waaya aragnimada aad kula kulantay wadankaaga iyo wadadaada halkaan. Sababtoo ah ma iloobi kartid (ha damaan) waaya aranimadaas aadka u xun weli iyo xasuusta ku xanuunsiyo.

**Ruuxa dhaawacan** waa xanuun badanyahay, xittaa in kastoo aadan arki karin dhaawacyada. Oo waxaadna inta badan dareemi kartaa caawin la'aan sababtoo ahma haysid wax afkaaro ah ee waxa la sameeyo ee lagu daaweynayo dhaawacyadaas.

Qof walba ayaa og waxa dhaawaca jirka uu yahay iyo waxa laga sameeyo iyada, miyaysan ogeen? Halkaan waa tusaale:

Waxaad ka dhacday baskiilkaaga oo gacantaada way xanuunsatay. Waxaad leedahau dhaawacyada nadiifinta ee jilbahaaga oo waad dhiig baxeysaa. Aad dhaqtarka ama isbitaalka si gacantaada la baaro. Dhaqtarka ayaa nadiifiyaa oo jeermiska ka nadiifiyaa dhaawacyada jilbahaaga, si markaas aysan u qaadsamin. Wuxuu ka qaadaa raajo gacantaada oo arkaa haddii ay jabsantahay. Wuxuu geliyaa gacantaada shey si markaas aadan u dhaqaajin iyo lafta si nadiif ah ayay dib ugu kortaa. Lix isbuuc kadib, dhaqtarka ayaa ka saaro sheyga, gacantaada way bogsataa oo xanuun la'aan ah iyo jilibkaaga wuu bogsooday, sidoo kale.



Daaweynta dhaqtarka waxay u ogolaaneysaa dhaawacyadaada si uu u bogsoodo. Sawirada raajada ayaa mar walba muujinayo in gacantaada ay mar jabtay oo waxaad ku lahaaneysaa nabaro jilibkaaga. Laakin maku xanuunjinayaan. Si xor ah ayaad gacantaada u dhaqaajin kartaa markale. Wuxuu raaci kartaa baskiilkaga markale!

Aad uguma kala duwana **dhaawacyada ruuxaaaga**. Kuwaan sidoo kale waxay sababaan waaya aragnimo xanuun badan, laakin waxaan marmar siinaa dareenkeena buuxo. Ma aadno dhaqtarka; ma weydiisano caawin. Waxaan u fakarnaa inaan xooganaano kaliya oo iskooda ayay u boksoonayaan.

Iyo taasi caadi ahaan ayay u shaqeysaa, sidoo kale, markii dhaawacyada ruuxa uu yaryahay, sida markii qof dhaawaco dareemaheena ama markii saaxib wanaagsan u guuro magaalo kale.

Laakin kadib ay jiraan **dhaawacyo daran ee ruuxa** inuusan jirin qof si sahlan uga soo qabsan karo oo waxaan si xoogleh u dareenaa cawaaqibtooda muudo dheer. Cawaqaqibtaan way na cadaabtaa iyo inta badan nafsadooda ma aadaan. **Dhaawacyadaan ugu daran ee ruuxa** waxaa loo yaqaan **argagax**. Erayga argagaxa wuxuu ka imaaday qadiimiga Gariiga oo wuxuu micnahiisa yahay 'dhaawac.' Waxaa laga yaabaa inay jiraan eray gaar ah ee midaan oo luuqadaada?

Waad aqoonsan kartaa naxdintaka ama dhoor jahwareer ee **saameynada** dhaawacyadaan aanan la arkeynin ee ay ku leeyihiin dabeecadaada iyo dareemaha, iyo in saameynadaan ma dhammaadaan, xittaa markii waaya aragnimada xun ay dhammaato. Saameynadaan waxaa loo yaqaan **aastaamaha**, dhabitii sida loo yaqaan marka aad **tustid aastaamaha** jirada jirka. Laakin ha walaacin, taasi micnaheeda ma ahan inaad liidato ama 'waalantayah'! Waxay micnaheeda tahay in qof walba ee la kulmo waxa aad la kulantay wuxuu la dhibaatoonaya dhaawacyada ruuxiisa ama ruuxeeda, iyo dabeecadooda iyo dareenka wuxuu u badalmayaan si la garan karo. Gabi ahaanba waa **caadi** in waaya aragnimada dhibaatada ah ay qofka badalaan. Laakin waxa laguugu qasbay inaad la kulantid caadi ma ahan, waa waali dhab ah! Si aad u aragtid waxa saameynadaan (aastaamaha) ay u ekaan karaan, waxaad hadhowdii ka aqrin kartaa Sadarka 1.3.

Waa muhiim in la ogaado inaad sameyn kartid wax lagu daaweynayo ruuxaaga. Waad daaweyn kartaa aastaamaha si markaas aysan markale kuu ciqaabin. Xitaa waxaad ka dhigi kartaa inay baxaan, si markaas aad nafsadaada u ahaatid markale. Kadib adiga, waxaad u aqoonsaneysaa sida nafsadaada. Masoo celin kartid waaya aragnimada xun, hadeer ka bilow waxay ka mid yihiin taariiqda noloshaada. Waxaa jirayo dhaawacyo, laakin waan daaweyn karnaa dhaawaca in waaya aragnimadaan way ku saameysay. Buuggaan wuxuu ku siin karaa caawinta qaarkood. **Waxay caawineysaa inay naftaada caawiso!** Waxaad u baahaneysaa dulqaad badan iyo daacadnimada ayaa go'aansata inay wanaagsanaato. Haddii aad qabtaan labadaan, waa muhiim inaad marka koowaad si wanaagsan u fahamtid nafsadaada. Goortii aad fahamtaan xiriirkha u dhaxeeyo waxyaabaha xun ee aad la kulantay iyo saameynadooda ee ruuxaaga, waxaad sidoo kale fahmeysaa inaadan waalaneynin. Sida aan dhahay ka hor, **ADIGAU ma waalanid, WAALIDA WAA WAXYAABAHADIGA KUGU DHACO!** Ruux walba ee dunida ku nool way la dhibaatoonayaan; waxay helayaan dareenka in maskaxdaada iyo jirka aanan la xukumi karin. Laakin taasi waala daaweyn karaa! Waa inaad fahmeysaa dhinacyada nafsadaada, taas oo ah

mida ugu horeyso oo waxayna noqon kartaa tallaabada ugu muhiimsan daaweynta. Aqrinta kadib Sadarka 1, wuxaan si wanaagsan u fahmi kartaa saameynada waaya aragnimada xun!

## **1.2. Maxaa sabab dhibaatada dareenka daran? – Dhacdooyinka naxdinta**

Hadeer waan ognahay in dhaawacyada ugu daran ee ruuxa waxaa loo yaqaan **jahwareer**. Naxdinta waa waaya aragnimo nadxin ah ee la soo dhaafay (!) halkee

- **Noloshaada** ama **nolosha** dadka kale ay **halis** ku jirtay
- waxaa laguugu qasbay inaad ogaatid **jirdilka** ama **dhimashada** aadanaha kale
- adiga laftaada lagu **jirdilay** ama lagu **kufsaday**
- aad midkood ka ordi weysay ama aad xaalada badeli weysay, **aadan ka carari karin ama dagaalami karin**
- waad **argagaxsaneyd**
- waxaa dareentay **caawin la'aan** iyo **awood la'aan**
- oo waxaad ka **naxsaneyd** waxa dhacay



Tusaalooyinka argagaxa, dhacdooyinka waaya aragnimo/jahwareer aanan la sharaxi karin waa weerarka dagaalka ah ee qoyskaaga ama saaxibada, xadgudubka jirka/dareeka, jirdilka, xabsiyeynta, kufsigaa, waaya aragnimada dagaalada, dhimishada dadka kuu dhow ama qaaliga kugu ah, waayitaanka qaraabada, kalago'a xooga ah ee xubnaha qoyska, dagaalka, masiibada dabiiciga ama dhlilka ah...iyo waaya aragnimo kale oo naxdin leh ee aanan la sharaxi karin oo dhibaato u ah ruuxa!

Dad badan waxay la kulmee in kabaden hal waaya aragnimo naxdin ah, qaarkood ku noollaa xabsiga ama aagaga dagaalada oo sannooyin ah. Tani waxay ka dhigtaa dhaawacyada ruuxa xittaa kuwa aad u daran.

Dhacdooyinka naxdinta **si ula kac ah uu u sababay aadane kale** sida jirdilka, dagaalka ama dagaalka galmada xittaa way ka adagyihii in laga soo kabsado iyo xittaa aad u dhaawaceysa in kabaden dhaawaca sida shilka gaariga ama masiibada dabiiciga ah. Noocyadaan dhacdooyinka naxdinta waxay lulaan aasaaska badan ee fahamkeena dunida iyo aadanaha. Marnaba uma moodin in dadka sidaas u xumaanayaan oo aanan fahmi karin. Xaqiiqda dadka waxay awoodaan cabsida noocaas ah waa argagax oo way adkeysaa in qofna la 'aamino.

Marka, waxaan ka hadleynaa dhacdooyinka sababayo xaalada **buuxdhaafa ah ee cabsida, ceeb iyo rajo beelida** ee horaantii ee qof walba joogo dunida. Waxaa sidoo kale loogu yeeraa **xaalada aanan laga bixi karin**, sababtoo ah ma jiraan dhabitii waxaan sameyn karno, gabii ahaanba waxaan nahay caawin la'aan iyo awood la'aan. Kama aadan fakan karin xaalada, oo ma jiro qof kale oo midkood lahaan karo!

Adiga oo aqrinayo leemankaan, waxaa lagu xasuusin karaa waxyabaha adiga kugu dhacay. Isku day inaad iska riixdid wax yar si markaas aad u sii joogteysid inaad diirada saartid. Ma rabno inaan la joognosharafeynada, waxaan rabnaa inaan horay u eegno sida wanaagsan ee aad ula qabsan kartid iyada.

Laga yaabo jimicnsigaan yar ee ugu horeeyo waxay ku caawinayaan:

### **Jimicsiga 1: Qasnada**

Ma taqaanaa waxa qasnad ay tahay? Waa armaajo weyn, culus oo bangi ah, halkaas oo lacagta su nabad ah loogu keydiyo. Qasnada waxay leedahay quful adag ama fure lambar ah, marka way adagtahay in qof walba uu gudaha galoo. Qasnada inta badan waxaa lagu hayaa qol gooni ah.



Aan raadino meel noocaas ah hadeer. Meel aad si xaqiq ah ugu meeleen kartid afkaaraha iyo sawirada dhacdooyinka naxdinta illaa aad ka haysatid xoog kugu fillan oo iyaga aad ku eegtid markale. Iskuday inaad qiyaastid meel halka afkaarahaan, sawirada iyo dareemaha si badbaado ah loo gelin karo illaa aad diyaar u tahay inaad iyaga la shaqeysid. Waa inay badbaado la ahaataa kaliya hal fure, oo waxaa tahay qofka kaliya oo furi karo iyada. Badbaadadaada waxay noqon kartaa god qoto dheer ee Dhulka ku jiro, qafis, god ama wax la mid ah. Maxay meeshaada gaarka ah u ketahay? Halkee ayaad si badbaado ah u dhigi kartaa afkaarahaaga ugu qoto dheer iyo dareemaha? Maxay aaga u egtahay? Sidee ayaad halkaas ku tagtay?

Marka aad afkaar leedahay, isku day inaad qiyaastid meeshaan si cad. Ma arki kartaa? Waxaa wanaagsanaaneyso haddii aad hadda halkaan ku sawireysid sawir iyada:

Hadeer, markii afkaaraha iyo sawirada dhacdooyinka naxdinta ay qalbigaaga soo galaan, arag qasnadaada (ama wax walba oo meeshaada gaarka ah ay tahay) oo ka dib ka laabo afkaarta iyos awirada qasnada, adiga oo ku dhahayo iyaga, "***Hadeer waa i dhibeysaan aniga! Wuxaan idin gelinayaa qasnada oo waan idinka fakarayaa marka aan go'aansado inaan idinka fakero!***"

Haka niyad jabin marka aysan isla markaasba kuu shaqeeynin. Qabo haay afkaarahaan ku dhibayo iyo dareemaha marka ay yimaadaan oo dib ugu celi qasnada, markale iyo markale, marwalba siinta isla amarka, "***Hadeer waad idhibeysaa! Wuxaan idin gelinayaa qasnada oo waan idinka fakarayaa marka aan go'aansado inaan idinka fakero!***"

Iyada oo ku jirtoj jimicsi badan waxaad baraneysaa inaad ka fogaatid nafsadaada afkaaraha ku dhibayo iyo dareemaha, dhinac iska dhig si aysan markale usoo dhaxgalin maskaxdaada oo aad si wanaagsan u xakameyn kartid. Waxaad tahay badrooniga madaxaaga!


### **Weecashada: Awooda qiyaaliga**

Waxay illa tahay, adiga oo aqrinayo tababarkaan, waxaad ku fakartay, "Wax micna daro ah! Sidee ayay ii caawin kartaa inaan **qiyaaso** qasnad ama wax kale ee sideeda ah?"

Waayahay, aan kuu sharaxo wax ku saabsan qiyaasida (**muuqaalyada**) ee adiga. Afkaaraheena iyo socdaalada waxay leeyihii **awood** weyn. Waxay dhagalaan dareemaheena iyo dabeeecadaana oo dhinacyada nolosha.

Waxaa laga yaabaa inaad ogtahay midaan. Markii xasusasho faran ay soo dhaceen, waxaad isla markiiba dareentay caawin la'aan iyo farxad la'aan. **Xasusashada ma ahan wax ka badan qiyaasida**. Qiyaasida waxa kugu dhacay waqtiga la soo dhaafay. Inta badan waa afkaaro mugdi ah iyo sawiro kugu xiro dhammaan tamartaada, taas oo ka dhigeyso inaad ku dhacdid god qoto dheer, mugdi ah oo aan farxad laheyn.


Jirkeena iyo riixeena wuu ka falceliyaa qiyaasida iyo afkaaraha. Sawir liimo! Liimo weyn, cusub, jaale ah. Ma qiyaasi kartaa sida ay u carfeys? Qiyaas inaad kala goysay ee aad qaniinyo weyn ka goosatay! Ma arki kartaa? Ma ogaatay sida biyaha afkaaga iyo wajigaaga u kaduuto?



**Qiyaasaha waxay ssaameysaa jirkeena ama dareemaheena!** Jaheynta wanaagsan, sidoo kale. Baaritaanka maskaxda way hormarisay midaan. Qiyaasaha wanaagsan waxay ku caawiyaan dadka inay fududeeyaa dhibaatada ay sababtay waaya aragniamada naxdinta! Qiyaasaha caafimaadan waxay badeshaa afkaaraheena iyo dareemaha marka aan ku Aadino iyaga dhinaca sida aan rabno inaan ahaano. Kuwa badan oo maadadaan ee Sadarka 2.

### **1.3. Maxaa ka dhaca maskaxdeyda inta lagu jiro dhacdada naxdinta iyo sida midaas ay ii saameysay? – Natijjooyinka cilmi baarista maskaxda, cudurka naxdinta muragada la soo dhaafay (PTSD) iyo aastaamaha murugada**


Xaalada naxdinta waxay u hogaamisaa **murugo duran**. Waa xaalad ay dadka kaligood la kulmi karaan. Wuxaan jeclaan lahaa inaan sharaxo oo ku tusiyo waxa ku dhaco maskaxdaada inta lagu jiro waaya aragnimada naxdinta. Kadib tani waxay sharaxeysaa sababta saameynta ay weli u dhibaateyneysp xittaa in kastoo dhacdooyinka naxdinta la soo dhaafay. Kuwa badan ee aan ugu yeerno ruuxa ama isbiirid ayaa dagan maskaxda. Maskaxda waa kumbuyutarka maskaxdeena, kormeerida afkaaraheena, dareemaha, dabeeecada iyo jirkeena oo dhan.



Maskaxda aadanaha waxay ka sameysantahay qeybo kala duwan. Qeyb walba waxay leedahay shaqadeeda gaarka ah, la shaqeynta qeybaha kale ee xaalad walboo adag. Waxay u egtahay sida dhinaca bidix ee sawirka hoose.

**Maskaxda**


**Jadwalka matalaada maskaxda**




Taqasusyada maskaxda waxay daraasadeeyeen dhammaan ka baaran daga adag ee maskaxdeena si markaas si wanaagsan loo fahmo. Wax walba aan ku fakerno, aan dareeno iyo sameyno waxaa laga kormeeraa dusha sare ee halkaas. Maxaa noo muhiim ah hadeer, waa waxa ka dhaco maskaxda marka aan qabno waayo aragnimo naxdin leh; marka aan la dhibaatooneyno murugo, oo aan ku jirno halis daran. In kabadan 20 -kii sanno ee la soo dhaafay, maskaxda baarayaasha waxay ogaadeen waxyaabo cajiib ah ee kugu caawinayo u fahamka nafsadaada si wanaagsan.

Qeybaha maskaxda ee aan rabno inaan ka hadalno waa sawirka kore ee midigta, ee qaab fududeeyo.

**Maskaxda** sidoo kale waxaa loo yaqaan **lafta maskaxda**. Tani waa qeybta ugu weyn ee maskaxda aadanaha. Xaywaanada sidoo kale waxay leeyihii qeybtaan maskaxda ah. Waa qeybta maskaxdaee maamusho badbaadinta maskaxdeena iyo shaqooyinka jirkeena, sida neefsiga. Maskaxda hoose ayaa masuul ka ah ka falcelinta siinyaalada-degdega halista ku ah. Tusaale ahaan, markii qof kugu tuuro dhagax, waxaad si **toos ah** dhinac ugu gabaneysaa si aanan kugu dhicin. Ma jiro waqtii aad uga fakartid, way dhacdaa kaliya. Waa isku midka markii qof gacantooda kuu qaadaan si ay kugu dhuftaan. Waxaad si **toos ah** u qaaday gacantaada si aad uga illaalisdid nafsadaada dabeysa. Falcelinadaan dabiiciga ah waxaa maamulo maskaxda hoose. Maskaxda ayaa sidoo kale ka masuul ah siinyaalaha-degdeg ah ee falcelinada **dagaalka ama duulimaadka**.



**Dareemaheena** waa la kormeeraa oo waxaa xakameeyo **maskaxda dhexe**, ama qeybta dhexe ee maskaxdeena. Maskaxda sidoo kale waxay maamushaa **xasuusashadeena iyo xasuusta**. Laakin xalinta iyo buuxinta xasuusaha booska saxda ah waa shaqada **maskaxda kore**. Maskaxda kore waxay kala soocdaa waaya aragnimadeena sida waafqsan booska iyo waqtiga, marka waan xasusan karnaa **halka iyo goorta** dhacdo ay ka dhacdo.




**Maskaxda kore** waa waxa naga gooniyeeyo xayawaanada. Waa masuuliyada **fakerkeena**. Waxay nasiisaa kartida lagu muujiyo nafsaadeena, si aan u fahamno dunida, si loo sameeyo go'aano, loo qorsheeyo, loo bartoo oo loo hadlo.



**Maskaxda kore**  
Afkaarta iyo qoondeynta


Sida horay loo sheegay, maskaxda kore ayaa kala saarto xasuusashadeena sida waafaqsan nooska iyo waqtiga. Waxay gelisaa iyaga booska saxda ah, si markaas marka aan xasuusano, aan u dhihi karno, "Oh haa, taasi waxay aheyd sannadka 2000, maalinteyda ugu horeysay ee dugsiga, iyo aad ayaan u faraxsanaa!" Haddii maskaxda kore aysan kala saarin xasuusaheena iyo waaya aragnimada, waxay si sahlan ugu duulayaan agagaarka maskaxdeena, oo imaan kara xili walba iyada oo aan jirin afkaarta ugu yar halka ay ka imaadeen iyo waaya aragnimada ay ka midyihiin. Waxay noqon kartaa midda dareemaha imaado, sida aad u farxida maalinta koowaad ee dugsiga, laakin waxaan ogaaneynaa in dareemahaan ay ka mid yihiin xasuusta maalinteenaa ugu horeysay ee dugsiga. Si sahlan ayaan ugu faraxsannahay inaga oo aan ogaanin sababta iyo inaga oo aan ogaanin sababta farxadeena ay ku xirantahay ee la soo dhaafay oo ma jiraan dhacdo farxadeed oo imaaneyso hadeer.



### Shaqada maskaxda kore:

Kala soocida kumeelgaarka ee waaya  
aragnimada


Caadi ahaan, sadexdaan qeybood ee maskaxda waxay u shaqeeyaan si wanaagsan oo usu dhow. Barnaamijka kumbiyutarka wuxuu u socdaa si habsami ah. Si wadajir ah, **maskaxdeenaahoose** iyo **maskaxda dhexe** waxay baaraan dhammaan warbixinta soo socoto, ee go'aansaneyso haddii halis ay soo muuqato ama haddii kale. Marka aanan halis jirin, **maskaxda hoose** waxay ku tiirsantahay **maskaxda kore** oo dhinaca **maskaxda dhexe**. **Maskaxda hoose** ayaa si joogto ah u dajisaa nefsigeneen, dheefshiidka, hurdada iyo garaaca wadnaha, marka wax walba ee ku jira jirkeena si ay ugu shaqeeyaan si caadi ah. Goortii **maskaxda dhexe**, bartamaha aragtida dareenka, waxay soo jeedisaa inay maalin wanaagsan noqon laheyd in la aado barkada dabaasha sababtoo ah quraxda way dhalaaleysaa, **maskaxda kore** ayaa soo gasha oo tixgelisaa. Haddii aan raaco rabitaanka ama miyay jiraan wax kale ee la tixgelinayo? Goortii maskaxda kore xasuuusataa waa inaad u dhameysaa warqad muhiim ah badroonigaada ama dugsiga, waxay ku xiriirisaa middaan maskaxda dhexe oo waxay ka hadlaan dooqyadaada oo la imaadaa xal guud. Tusaalahaan, xalka wuxuu noqon karaa dhameystirka waraaqaha marka koowaad, iyo kadib aad barkada dabaasha. Cagliga (maskaxda kore) iyo dareemaha (maskaxda dhexe) waxay la timid heshiis nabad ah.



Maskaxda hoose ayaa  
sawirtaa dhammaan  
warbixinta soo  
socota/dhacdooyinka


Maskaxda hoose ayaa dejisaa  
neefsashada, qiimaha wadnaha,  
iwm.

Markii dareenka maskaxda hoose iyo maskaxda dhexe halis geliyaan warbixin xigta, ka bilow waqtigaas, dhammaan warbixinta xigta waxay **si toos ah** u aadaa **maskaxda dhexe** halka nooca **nidaamka alaarmiga ka damaa madaxaaga** iyo **barnaamijka masiibada** ayaa la bilaabay. Barnaamijka masiibada ayaa **ka jaro xiriirkka maskaxda kore** sababtoo ah waqtiga maskaxda kore wuxuu leeyahay dooqyo la miisaamay oo go'aansado in mar hore laga daahi karo! Marka, ma jiraan wax laga dhaho hadeer oo la damiyaa. Taasi waa sida xiritaanka albaabka iyo maskaxda kore ma oga waxa dhacayo. **Maskaxda hoose** hadeer waa **badrooniga madaxaaga**. **Caadi ahaan**, marka aysan halis jirin, maskaxda kore ayaa sameyso dhammaan go'aamada. **Masiibada**, maskaxda hoose ayaa la wareegto iyo **jirkaaga oo dhan waxaa loo diyaariiyay inuu qaxo ama duulo**. Maskaxda hoose micno ahaan waxay 'baabi'sa tamarta buuxdo ee jirkaaga, iyaga oo u dirayo fariimo murugo ah meel walba. Waxaad ku jirtaa xaalada xiisad aad u kacsan. Waa wax sida darawalka gaariga tartanka ka hor inta uusan yeerin qoriga bilowga, kacsan, si balaaran u soo jeedo oo diyaar u ah inuu dhufto gaaska midda labaad waxaa damo siinyaalada bilowga.



Maadaama maskaxda kore la jaro xiligaan, ma kala saari karto oo kama baaran dagi karto waxa dhacayo. Taasi waxay la micna tahay, waxay xasususan kartaa dhacdooyinka, laakin ma go'aansan karto, tusaale ahaan, **haddii ay hadeer dhacayaan ama mar hore la soo dhaafay.**

Si loo kala saaro dhacdooyinka waqtigooda iyo booska caadi ahaan waa shaqada maskaxda kore.



!

### Aad ayay muhiim u tahay in la ogaado...

...in ku xiritaanka albaabka ee maskaxda kore ay tahay **shaqada illaalada** maskaxdeena oo **muhiim ayay u tahay badbaadadeena**! Haddii maskaxdeena qaadato waqtiga lagu miisaamayo dhammaan dooqyada, nooma suurtogaleyo inaan ka falcelino dhaqso si ku fillan illaa, tusaale ahaan, nolosheena badbaadiyaa. Dhibaatada kuma saabsano kala saarida iyo ka fakerida, waxay ku saabsantahay badbaadada! Dhab ahaantii, waxay dhammaantood sameysaa dareen wanaagsan. Iyo waa **nidaam toos ah** ee maskaxda! Wuxaan **si toos ah** uga falcelineynaa dhibaatada dagaalka ama qaxida ama marka aanan sameyn karin midkood kuwaan, waxaan noqonaa dareen la'aan. Sida aan uga falcelino xaalado noocaas ah ma ahan **go'aanka**, waa nidaam toos ah! Inta badan ma ogaano wxaa dhacayo, ama waxaan ula kulmeynaa sida **ka imaneeyso baaxad balaaran**. Maskaxda kore waa la damiyaa oo markale ma saameyn kartoo wuxaan sameyno ama aanan sameynin.


Hadhowdii dambe, markii dhibaatada ay dhammaato, albaabada ee ku socda maskaxda kore way furanyihiin markale iyo maskaxda kore waxay bilowdaa inay fakerto oo cajiib ahaato. Waxay inta badan walaacisaa waxa si ka duwan loo sameyn lahaa iyo eedeymaha nafsadeeda guul darada ah. Sidaas darteeda, **dareemaha dambiga** ayaa imaado, laakin **iyada (adiga) ma laheyn wax dooq ah, albaabada si dhuuqsan ayaa loo xiray!**

Intaa waxaa dheer, ee xiggay masiibada, maskaxda kore way jahwareersantahay sababtoo ah sawiro badan oo burbursan ka soo baxaan in maskaxda kore aysan kormeeri karin oo aad kala saari karin sida caadi ahaan ay sameyso. Tani dhab ahaantii waa argagaxa sababtoo ah ma fahamsana waxa dhacay oo si sax uma kala saari karo dareemada. Xasuusaha waxay u muuqdaan side qeyb gaaban ee filim kali, sawirada la gooniyeeyay ayaa siinyaaleeyo. Waxay noqon kartaa dareemaha markaasba imaado, walaaca, garaaca wadnaha, qasnaanta, iyo maskaxda kore – inaga, sidaaadane fakerayo – ma garaneyno sababta. Mararka qaarkood maskaxda kore waxay si fudud u damisaa markale sababtoo ah aad ayay u badantahay. Tani waxay la micna tahay in goortii xasuusaha dhacdooyinka naxdinta ku imaadaanse qeybo iyo burbursan, si cad uma fakari karno sababtoo ah maskaxda kore ayaa si fudud u xirtaa markale albaabka. Marka, ma lihin wax xakameyn ah ee xasuusashadaan soo laabanayo. Waxay inta badan dareemaan sida inay hadeer dhacayaan sababtoo ah maskaxda kore ma gelin karto weelka saxda weli. Maskaxdeena kore ma go'aansan karto haddii wax ay dhacayaan hadeer ama ay dhaceen waqtiga la soo dhaafay. Oo waxaan uga falcelinaa midaan murugo xad dhaaf ah. Waxaan dib ugu laabanaa habka dagaalka iyo duulimaadka oo ka illalinaa nafsadeena inaga oo u dhaqmeyno sida masiibada Halkaan iyo Hadhow. Iyo inkastoo tallaaboooyinkaay saxnaayeen oo muhiimna u ahaayeen badbaadada dhibaatooyinka, markale kuma haboona Halkaan iyo Hadeer, sida dhibaatada ay u dhammaatay. Laakin ma arki karno midaas. Tani waxay u hogaamin kartaa dabeecada **dagaalka** ee aanan la xakameyn. Qaar ka mid ah dadka **iyaga ayaa isku sameeyo waxyelo** ee sida xaaladaha, loogu gargaarayo xiisaha iyo cadaadiska. Waxyar kadib sidaan oo kale, si cad uma fakari karno sababtoo ah maskaxda kore ayaa is damisay nafsadeeda. Albaabada ee maskaxda kore way xirantahay markale. Barnaamijka dhibaatada dib ayaa loo daaraa, inkastoo dhibaatada ay dhaaftay.

Markale iyo markale, xasuusaha ayaa nala qabsado oo ma jiraan wax aan ka sameyn karno iyada. Gaar ahaan markii ay wax ayna **xasuusyaan ee dhacdada naxdinta**, tusaale ahaan midibka dhulka ama dareemaha walaaca iyo rajo beelida.


Oo ay la jiraan shaqada adag iyo dadaalka, tani waxay joogsaneysaa marka aan ka dhaadhiciyo maskaxda kore in xasuusta ay ka mid tahay waqtiga la soo dhaafay, oo waa inay nagu caawisaa kala soocida. Waa arinta dib loo qaabeynayo kumbuyutarka horteeno iyada oo la daminayo barnaamijka dhibaatada oo dib loo kicinayo barnaamijka caadiga ah! Sida looga dhaadhiciyo maskaxdaada kore si aad u damisid barnaamijka dhibaatada waxaa lagu sharaxay si u dhow Sadarka 2.

Waxaan jeelaan lahaa inaan ku tusiiyo sawir kale oo sharaxayo waxa dhaco marka aan la kulano dhacdada naxdinta ah:




Leenka qaloocan waa xiisaha qalooca ee muujinayo inta murugo ah aad ku dareentid waqtiga la siiyay. Caadi ahaan, waxay u socotaa kor iyo hoos in ka badan meel gaarka ah. Mararka qaar si ayaan u giigsannahay oo u murugeysannahay goortii, tusaale ahaan, waxaan qaadeynaa baaritaan. Waqtiyada kale waan dagannahay oo sahal ah goortii, tusaale ahaan, waxaan ku jiifnaa fadhiga inaga oo dhageysaneyno muusig wanaagsan. Aagaan, xiisaha kordhay ama hoos u dhacday iyo murugada gabii ahaanba waa caadi. Dhammaan qeybaha maskaxda waxay u wada shaqeynayaan si habsami leh.

Laakin xaalada naxdinta, midkoodna ma dagaalameyno mana carareyno, halkas oo aan dareeno gabii ahaanba caawin la'aan iyo naxariista dadka kale, kadib murugada iyo xiisaha aad ayay u weyntahay inay ka sareyso si dhaafsan barta halka aan ku raageyno. Maskaxda kore ayaa danto si markaas maskaxda hoose ay uga falceliso durbadiiba halista laga yaabo. Laakin haddii aanan ka ordi karin halista oo aanan ka difaaci karin nafsadeena, nooca dareen la'aanta aaya ku dagan. Sida nidaamka korontada ay buux dhaafto oo afuufto fiyuuska. Markii xaalada ay aad halis u tahay oo ma jiraan wax aan sameyn karno si aan u badelno iyada, wacyigelinteenaa way dantaa si ay noo illaaliso. Waa sida haddii aanan halkas joogin, xitta inkastoo jirkeena weli uu xaadir yahay. Oo luuqad xirfadeed ah, tani waxaa loo yaqaanaa **iskala-soocida**. Iyo muddo, xiisaha waa la waayaa gabii ahaanba.




Markii aan la kulano dhacdadad naxdinta ee maskaxdeena hoose way ka shaqo badan tahay sida ay aheyd ka hor xaalada murugada daran. Inaga ayay hoos noogu sheegtaa, marka la hadlida, in halista ay noqon karto dhuumashada ku saabsan meel walba oo waa inaan ka digtoonaanaa. Saameynadaan fikirkeena, xittaa marka aan si wanaagsan u ognahay. Kadibna waan ka-taxadarnaa badelkii halisgelinta halista. Ee noo hogaamiso si looga **fogaado** wax walba ee laga yaabo inay soo xasuusiso dhacdana naxdinta. Mararka qaar, waxaan ku fogaanaa si aan uga fogaano inaan xiriir dhow dadka kale iyo dareemaha sababtoo ah waxay nooqon karaan halis. Tani waxaa loo yaqaan **ka fogaanshaha dabeecada**. Dadka qaarkood waxay isku dayaan inay xiraan xasuusaha xun ee wata **alkulada** iyo **qamriga**, taas oo kaliya abuurto xittaa dhibaatooyin badan.

Maskaxda hoose hadeer aad ayay u shaqeysaa si aan u helno nafsadeena ku dhawaadkii heerka joogta ah ee digniinta. Wuxuu nahay **wax ka badan-digniinta** marka waan ka falcelin haddii wax halis ah dhacaan. Tani waxay la micna tahay inaan si joogta ah u xiisno oo diyaar u ah tallaabo. Xiisaha qaloocan wuxuu haystaa xadeynta kore. Halkudhigeena, marka si loo hadlo, wuu xawaareynaya oo xawaareynayo. Tani waxaa loo yaqaan inka badan-farxada, xaalada daalka ah ee naga illaaliso **huredeysiga ama hurdada habeenka oo dhan**. Aad ayaan uga **caroonaa**, halka xittaa waxyaabo yar waxay kicin kartaa xanaaqeena. **Diirad saarida** waxay sidoo kale aad uga adagtahay, tusaale ahaan dugsiga. Oo waxaan si joogta ah uga **walaacnaa**.



Haddii ay wax nasoo xasuusiyaan waaya aragnimada naxdinta, laga yaabo ur, arag ama dareen, dib ayaan u booqanaa waaya aragnimada, ama waxa la midka ah, ee maskaxdeena ku jiro. Xiisaha waxay u kacdaa si xoogan, waxaan si adag ugu adkeysanaa iyada. Wuxaan dareenaa sida haddii ka bogsaneyno waaya aragnimada oo dhammaan ah markale. Tani waxaa loo yaqaan **dib u xasuusashada**. Dib u xasuusashada waa **xasuusaha buuxa dhaafa** ee aanan suurtogaleynin in la xakameeyo. Waxay ku dhici karaan riyo inaga oo jiifno, qarowga ku saabsan dhacdooyinka naxdinta. Maskaxdeena korema oga haddii ay hadeer dhaceysyo ama la soo dhaafay.

Tani waxay naga dhigi kartaa kuwa aad u **dagaal** badan, xittaa markii caadi ahaan aan nabad nahay. Inta lagu jiro xiliyo noocas ah, ma lihin xakameyn. Caqligeena, maskaxdeena kore ma shaqeyneyso. Wuxaan xitaa **ku sameyn karnaa** inaan iska qaadno cadaadiska iyo ka baxsiga xasuusaha.





Waxyabaha iyo xaaladaha u hogaamin karo dib u xasusashada waxaa loo yaqaan **kiciyayaal**. Kiciyaha waxay noqon kartaa ku dhawaad wax walba oo marwalba way adagtahay in la ogaado wixa ay tahay. Goorma ayaan lahaaneynaa, tusaale ahaan, ka badbaaday weerarka qarax ah, kadibna dhawaqa diyaarad ayaa kicin karto dib u xasusashada. Waxaa kale oo suurtogal ah in inta lagu jiro qaraxa aan taagannahay meel u dhow duur ubax ah iyo carafta ubaxa ayaa waxay noogu soo laabataa xaalad la yaab leh. Tani ma ahan wax aan si kacsan u xakameysid ama u ogaatid. Waxaa jiro sharaxaadyo lagu keydiyay maskaxdeena oo waxaan marmar xasuuusanaa iyaga, laakin way kicin karaan dib u xasusashada. Iyo, sida aad mar hore u baratay, ma jiraan wado aad iyaga ku xakameyn kartid.

Dhab ahaantii, dhammaan nidaamyadaan waxay ka imaadaan maskaxdeena hoose oo rabta inay naga illaalo oo hubisaa inaan badbaadno. Taasi waa shaaqada maskaxda hoose iyo dhammaan aastaamahaan waxay leeyihii ujeedo, lagu magacaabo inay na badbaadiyaan oo naga illaaliyaan haliso dheeraad ah. Nasiib daro, aastaamaha ma sahlana in la damiyo markii halista ay dhaafsto oo aanan markale u baahanin iyaga. Halkaan

waa Jarmalka, duurka ubaxa ma ahan wax halista ah, maskaxda hoose way nasan kartaa. Laakin maskaxda hoose waxay keydisay xiriirka u dhaxeeyo urta carafta iyo dhacdooyinkaaga naxdinta, marka ubaxyada waxay weli matalayaan halista.


Markii aastaamo sii joogteeyaan inay nagu caqrqaladeyso muddoi dheer, tani waxaa loo yaqaan **naxdinta cudurada murugada la soo dhaafay (PTSD)**.

## LA SOO DHAAFAY - MURUGADA NAXDINTA - CUDURADA


« la soo dhaafay » Laatin oo <b>kadib</b>		
Kadib	... hal waaya aragnimo xun ama ka badan...	... cudurada/isbadelada way sii joogteeyaan inay ku carqaladeeyaan...

Laakin wax ayaan ka sameyn karnaa cuduradaan, ee ku saabsan farsamooyinka ee aanan markale u baahneyn oo carqaladeyso nololaheena. Waxaa jiro sadex shey ee aan u baahannahay inaan gaarno dhammaadkaan. Hasha gacan, waxaan u baahannahay dulqaad badan iyo dhaqan, sida lagu sheegay mar hore bilowga buuggaan, iyo gacanta kale, waxaan u baahannahay qaluubteena, kartideena ee sababta. Qaluubteena waxay markale noqon kartaa booska madaxeena, lagu qancinayo maskaxda hoose si ay u nasato oo si wanaagsan u aado fasaxa ay heshay!

Hadafka ugu muhiimsan waa in si tartiib ah loo baro maskaxda hoose in dhacdooyinka naxdinta ay tahay **mid la soo dhaafay. Way dhammaadeen!**



Waxaan u baahannahay inaan ka shaqeysiino maskaxdeena kore. Waa inay barataa inay kala saarto dhacdooyinka naxdinta ee qaanadaha saxda ah kadib markay dhacaan (dheeraad ah), xittaa in kastoo la damiyay inta lagu jiray dhacdooyinka.



Ma jirto shaqo sahan! Si kastaba, Sadarka 2 waxaad baraneysaa sida aad u caawin kartid maskaxdaada kore inay maamusho heshiiskaan.

Sida aad ugu shaqeyn kartid dhibaatooyinka gaarka ah ee kala duwan waxaa lagu qeexay Sadarka 3. Ma ahan in dhammaan carqaladaha ku dhacaan dadka oo dhan. Dadka qaarkood waxay dhibaato ku qabaan hurdada, kuwa kale waxay sahmiyaan xanaaqa ugu yar iyo kuwa kale waa marmar oo ku meelgaar si sahan 'aanan halkaas u joogin.' Dhibaato malahan waxay tahay, haddii ay jiraan wax ku carqaladeynayo oo aad la dhibaatooneysid sababtoo ah midaan, buugaan yar wuxuu kugu caawin karaa inaad midaas badeshid! Sadarkaan 3, waad arki kartaa oo aad ku dooran kartaa eegida waxa gaar ahaan kuu quseeyo adiga iyo waxa aad jeelaan laheyd inaad badeshid. Dabcan, waad aqrin kartaa wax walba! Laakin ka hor inta aadan sameynin midaas, waa inaad dhameysaa aqrinta sadarkaan oo aqri dhammaan Sadarka 2, sida midaan muhiim u tahay qof walba oo waa aasaaska ku dhaqanka Sadarka 3. Weli, ha iloobin inaad nasatid! Aad ayay muhiim u tahay inaad fahamsantahay yahay wax walba, u ogolaanayo in warbixinta si tartiib ah u gashid qaluubtaada. Sida aan dhahay, waxaad u baahantahay dulqaadka iyo dhaqanka laGU badelayo waxcyaabaha. Waad sameyn kartaa!

#### **1.4. Dhibaatooyinka dheeraadka ah iyo xaqiiqaha muragada lagu daray**

Waa musiibo inaad lahaatid waayo aragnimo noocaas oo xun. Wixii dad badan ah ee imaaday Jarmalka, dhibaatooyinkaan waxay ku darsameen dhibaatooyin kale oo badan.

Waxaad timid wadan kugu cusub ee leh dhaqan gabii ahaanba kala duwan iyo luuqad. Wax walba way cusubiyihii oo way kala duwanyihii oo waxaad dareentay in lagu barakiciyay, waad fahamtaa wax walba oo waa inaad heshid wadadaada ee dhinaca xaalad gabii ahaanba cusub. Gaar ahaan soo dhaweyntaada koowaad ee xerada bulshada gaar ahaan adagtahay. Ma heysid wax waqtii ah kaligaa, waxaa jiro waxyaabo imaanayo iyo waxyaabo socdo ee kugu haraareysan oo ma lihid nabad iyo daganaan. Waa inaad la qabsataa dhammaan dadkaan aanan la garaneyn iyo dhibaatadeeda gaarka ah ee loogu noolaado koox ahaan marka aadan dareemin

wanaag sababtoo ah waxaad la yeelatay duulimaad dheer oo adag oo waad u xiistay wadankaaga hooyo. Waxaa inta badan jira qilaaf iyo dhibaato ee dadka kale ah, taas oo si fudud ugu darto murugadaada.

Sidoo kale, dad badan waxay u xiiseen saaxibadooda iyo qoysaska iyo si xun ayay ugu walaacsanyihiin kuwa banaanka looga tagay ee wadanka hooyo ama aanan weli gaarin badbaadada Yurub. Laga yaabo inuu qof kaa lumay, ama wax ka badan hal qof, adiga kuu dhow iyo aadan la helin wax waqtii ah ee aad ugu calool xumaatid iyaga.

Iyo kadib waxaa jiro mustaqbal aanan la hubin. Sidee ayaan u noolaataadaa? Yaa i caawinaya? Miyaal la ii ogolaanayaa inaan halkaan joogo? Iyo sidaas oo sii socoto.

Mid walboo dhibaatooyinkaan ah way adagtahay in la ogaado. Dhammaantood waxay isu keenayaan culeys weyn.



Qeybta xigta, waxaan jeelaan lahaa inaan sharaxo dhor dhibaatooyin ee dad badan ay la dhibaatoodaan maRka ay qaataan waaya aragnimada naxdin.

Sida ay muhiim u tahay waa **jimicsiga iyo ciyaaraha**. Markii aan dhaqaajino jirkeena, maskaxdeena waxay soo dirtaa kiimikoyinka fariimo farxad ah si ay daarto dareemaheena. Helida hadafyada yar, shaqsiga qiyasay sidoo akle waxay na siisaa dareen wanaagsan ee ku saabsan nafsadeena oo kordhisaa isku kalsoonideena. Dhaqdhaqaaqa wuu joojiyaa afkaarta xun ee maskaxda si xun u fakarka. Marka, qimo ayay leedahay si nafsadaada loo qaado oo jirkaaga loo dhaqaajiy, xittaa haddii aadan dareemmin sideeda oo badelkii aad sariirta joogi laheyd. Lugey ama ciyaar qaar ka mid ah ciyaaraha, dhibaato malahan midka. Dheelida sidoo kale waa dooq.

### 2.6.2. Sharciyada

Tani waxaa si gaar ah loogu sheegaa dadka yar ee ka mid ah adiga ee ku dhaxnool xarunta gargaarka dhalinyarada.

Waxaa jiro sharciyo badan oo waana ogahay waxa intii badan aadan jecleyn sharciyada! Ma ahan inuu jecelyahay sharciyaad waxay qeyb ka tahay ahaanshaha dhalaan. Xiligaan noloshaada, waa muhiim in mararka laga hor imaadoo dadka weyn si marka aad u heshid wadadaada gaarka ah ee qaangaarnimada. Waa xid la kulmeysaa waqi ka duwan hadeer, ee la jirto shaqooyin yar, iyo dhammaan sharciyadaan uma muuqdaan inay wax badan caawiyaan. Dhammaan isku mid ah, aan dhaho in sharciyada sidoo kale ay bixiyaan qaabdhismeed ammaan ah. Waad ka guuri kartaa qaabdhismeedkaan, adiga oo og in markii aad jabisid sharciyada, waxaa jirayo cawaaqib. Taasi sidoo kale qaab amni ah, marka aad ogtaahy inay taasi dhaceysa marka aadan

sharchiyada raacin. Wuxaa ku tiirsanaan kartaa waxyabaha qaarkood ee dhacayo marka aad jabineysid sharciga qaar. Haddii aad raacdil sharchiyada ama aadan raacin, waa go'aankaaga. Laakin waad ogatahay qaabdhismedka aad ku nooshahay, sharchiyada xarunta ee halka aad ku nooshahay. Iyo masuulada maysan sameynin sharchiyada si noloshaada loo adkeeyo. Waxay u sameeyeen sharchiyada si ay kuu siyaan qaabdhismed cad oo badbaado ah, oo ka dhigayo nolosha la wadaago mid suurtogal ah. Waxay bixiyaan sharchiyadaan afkaaro badan iyo sharchiyada waxay leeyihii ujeedooyin cad. Markii dambe, noloshaada qof weynnimada, wuxaa sidoo kale ka hor imaaneysa sharciyada, tusaale ahaan goobtaada shaqo. Waxaa sidoo kale jiro sharchiyada taraafikada. Haddii laguugu qabto inaad dhaafeysid xadeynta xawaarah, waa inaad ganaax bixisa. Haddii aad shaqo imaatid waqtid dambe hal jeer oo waxbadan, waa lagu ceyrinayaa. Cawaaqibta dabeecadaada waa la qiyaasi karaa iyo **la qiyaasi karo micnaheeda waa amniga!** Adiga go'aanso sharchiyada la raaco. Ewaad ogatahay wuxa dhacayo markii aad jabiso sharchiyada. **Adiga ayaa xukumayo!**

## **2.7. Xiriirada bulshaada**

Dadka qaarkood ee la kulmay dhacdooyinka naxdinta way ka laabtaan, rajooyinka tani kaga illaolineysowaaya aragnimada xun ee dheeraadka ah. Waxay u arkaan mid adag in la aamino dadka kale. Laga yaabo adiga, sidoo kale, wad ka baqeysaa inaad culeys u noqotid qof ama dareentid inaad si naba u fahmeyn. Dadka qaarkood waxaa laga dhaadhiciyay inay ka shaqeeyaan dfhibaatooyinkooda iyaga nafsadooda ama dareemaan dambiile oo aanan ogolaaneyn wax caawin ah. Sidoo kale, cabsida ka hadleyso waxaa kaliya oo ay sii adkeyneysaa, dad badan inay ka fogaadaan isdhaxgalka bulshada.


Aadanaha waa xayawaan bulsho. Wuxaan u baahanahay xiriirkal lagu dareemayo wanaaga iyo badbaadada. Ka gooniyeenta nafsadaada waxay u hogaamisaa rarka oo kordhisaa kali ahaanshaha. **Isdhaxgalka bulshada si xad dhaaf ah ayay caawin u leedahay ee la qabsashada iyo ka baaran daga waaya aragnimo xun.**

**Xiriir walba ee dareemo in wanaaga uu caawin leeyahay!** Laga yaabo inuu jiro qof aad si sahlan ugu raaxeysatid inuu kula ciyaaro kaararka, iyo qof kale waxaad jaceshahay inaad kala hadashid dhibaatooyinka maalin walba, iyo weli qof kale ee kugu caawiyaa inaad buuxiso foomamka. Wuxaad dareemeysaa cida aad aamini kartid ama cida aad rabtid inaad u sheegtid waxa ku dhaqaajyo. Dabiici ahaan, wuxaad sidoo kale ku dhihi kartaa dadka adiga ku dhibaa! Ka feejignow waaya aragnimada hadeer iyo waaya aragnimada wanaagsan ee la soo dhaafay ee aad la wadaagtay dadka kale.

Isdhaxgalka ee dadka ee anan u dhaweyn, oo aan ku nooleyn wadan kale sidoo kale muhiim ayay u tahay xiriirkal bulshada. Mararka qaar suurtogal am ahan in lala soo xiriirkal dadka qaarkood. Laakin dadkaan muhiim ayay nooyihiin inaga. Sida dadka aan jacelnahay, laakin aanan markale ku nooleyn, weli waxay nala micna tahay wax badan. Wxaay na siyeen wax muhiim ah, iyo xasuustooda iyo waqtiyada la wadaagay waa keyd qiimo leh ee ianaga na raacyo. Sadarka 3.7., waad ka aqrin kartaa wax badan sida aad ula xiriirin kartid qof aanan markale kula jirin.

### **Jimicsiga 13: Xiriirkeyga bulshada**

Ka fakar dadkee ayaa adiga muhiim kugu ah ee aad garaneysid. Ku qor magacyadooda sawirka. Haddii aysan jirin wareegyada ku fillan, si sahlan u sawir wax badan oo wareegyo kale ee agagaarkaaga ah. Xitaa dadka ku noolaa meel ka fog ama dhintay way ka qeyb noqon karaan midaan. Waxay noqon kartaa dad aad jaceshahay inaad waqtli i sticmaahid, ee aad jaceshahay inaad lahashid, ee kaa qosolsiyo. Waxay noqon kartaa dad aad garaneysid inaad waqtli badan la sticmaashid ama marmar aragtid, ama dadka ka yimid waqtigaaga la soo dhaafay. Waxay noqon kartaa dad aad aragtid maalin walba ama kaliya marmar kula hadashid taleefonka. Waxay sidoo kale noqon kartaa dadka aanan joogin nolosha gabi ahaanba hadeer ee aad u fakartid inta badan. Hadeer ka fakir tayooyinka wanaagsan ee dadkaan. Maxaa kuu soo bandhigay wax ku saabsan iyaga? Maxaa iyaga ka mid ah e ku dareensiyo wanaag? Ma wax aad dhadidaa ama wax ay sameeyaan? Ma qaab gaar ah miyaa ee dadka ku dhaqmaan? Xigmadee caalamka ayaad isaga ka soo baratay isaga ama iyada? Maxaad ku raaxaeysatay ama aad ku raaxeysataa inaad iyaga la sameysid iyaga? Hoos ku qor jawaabaha ee su'aalahaan ee leemanka hoose ee wareegyada.



## **2.8. Wadaagida afkaaraha, muujinta nafsadaada, aasaas ahaanta**

Inta badan dadka waxay caawin ka helaan kala hadlida qof kale wax ku saabsan waxa ciriiri geliyaya ama wax ku saabsan walaacyadooda. Waxay dareemi kartaa wanaag aad ah oo ay ka hadasho xasuusaha, riyoooyinka, afkaaraha iyo dareemaha. Waxaa jiro dhahitaan af Jarmal ah ee dhaheyso, ***Murug la wadaagay waa murug lakala jaray.*** Tani waxay la micna tahay in dhibaatadaada gaarka ah ay yaraan karto marka aad la wadaagtid qof kale. Looma baahno inaad kaligaa dhibaatootid. Wadaagida waxay kugu caawin kartaa dareemida wanaag yar. Waa muhiim, inkastoo, la go'aansanayo nafsadaada cida iyo inta aad la wadaageysid! Ka faker cida aad jeclaan laheyd cida aad la wadaageysid iyo cida aadan la wadaageynin.



Ma jirtaa maahmaah luuqadaada oo leh isla micnaha? Dhaqamada qaarkood, dhibaatada eray ahaan looma muujin, laakin si dhawaq dheer aqrinta Quraanka la wadaagay. Tusaalooyineke iyo dhaqamadee ayaa ku jiro halkaas dhaqanka ee wadaagida dhibaatada?

Fananiin badan ayaa muujiyay dhibaatadooda gaarka ah ee sawirkooda, heesaha ama gabayada. Taasi sidoo kale waxay noqon kartaa daaweyn. Looma baahno inaad fanaan ahaatid si aad u sameysid. Wax ku qorista hoos ama keenista midibka waraaqda waxay qafiifineysaa ruuxaaga sababtoo ah way soo baxdaa badelkii joogista gudaha.

Miyay jiraan muusiga muujiyaa sida aad dareentid?

Midabadee iyo qaababkee ayaa sharaxo waaya aragnimadaada?

Heesahee ayaa muujiyo dareemo wanaagsan? Raaxo? Xamaasada? Baashaalka?

Sidee ayaad u sawiri laheyd dareemo farxad ah? Dheelitir dhibaatadaada ee leh dareemo wanaagsan iyo waaya aragnimada si markaas aanan kuu xabsiyeynin dhibaatadaada.


### **Sadarka 3: Waxa la sameeyo goorta...? – Ku caawi dhibaatooyinka gaarka ah**

#### **3.1. Ku adag hurdada iyo/ama hurdada illaa habeenkii**

Sadarka 1, waxaad baratay sababta waaya aragnimada naxdinta inta badan digniin ku siisaa. Maskaxda hoose ayaa ku hayso jirkaaga dareenka oo diyaar u ah inuu ka falceliyo halis walboo cusub. Tani inta badan waxay u hogaamisaa jiifka soo jeedka ah ee habeenkii sababtoo ah ma hurdi kartid, ama marka aad sameysid waad saaxataa, in aad kacdid inta badan oo aad dhibaato ku qabtid hurdo ku laabshada. Tani waxay ka dhacdaa xittaa dhinaca aanan jirin halis degdeg ah ee qolkaaga ama sariirta. Jiifashada soo jeedka ee habeenkii waxay casuuntaa afkaaro xun iyo maskaxda si xun u fakarka waxay ku bilaabataa wareegyada.

Sidaas darteeda, waa muhiim inaad si kacsan loo yareeyo **xiisaha jirka** ee maqribka. Diirada la saaray **jimicsiyada nasashada** waxay kugu caawin kartaa (**fiiri Sadarka 3.1.2.**). Halkaas, waxaan ku barayaa labo jimicsi aad isku dayi kartid. Waxaa jiro jimicsi kale, wanaagsan ee kugu caawinayo **afkaaro dagan** iyo ku wadidooda ee jahada nasashada. Dhammaadkaan, waad ka dooran kartaa mid ka mid ah **jimicsiyada muuqaalka** ee sadarkaan, **qeybta 3.1.3.**

Digniinta dheeraadka ah iyo dareenkooda la socdo waa sababta carqaladeynta **laxanka hurdada-kacitaanka** caadiga ah. Laxanka micnahiisa sharchiyeynta, sida ku jirto muusiga, halka xawaaraha ay sharchiyeynta ku celinta qaarkood. Waad qiyaasi kartaa laxanka huradada-kacitaanka sida midaan:



Waxaa jiro waqtii la seexanayo iyo waqtii la kacayo. Inta badan dadka waxay u baahanyihii 6 illaa 8 saacadaha hurdada si aad u dareentid digniinta inta lagu jiro maalinta. Markii laxankaan la carqaladeeyo, waxaad u baahantahay inaad tababarati nafsadaada si aad uga soo kabsatid. Illaa uu markale si toos ah noqdo. Si dib loogu helo laxankaaga hurdada-kacitaanka, waxaa jiro qaar ka midf ah sharchiyada la raacayo.

#### **3.1.1. Tilmaamaha hurdada wanaagsan ee habeenka**

Laxanka noolaha waa wax si joogta ah ku celin u ah. Waad sharchiyeynta 'saacadaadaa gudaha' adiga oo tababarayo jirkaaga si aad u seexatid waqtiga qaar. Waad barbardhigi kartaa quudinta waqtiga ee xayawaanada beerta. Marka aad quudisid iyaga isla waqtigaas maalin walba, kadib hal isbuuc marka xayawaanada bilaabeen inay u yeeraan quudintooda xiligaan. 'Saacadaadaa gudaha' waxay ku caawisay barnaamijyeynta cuntada hadeer.

#### Jimicsiga 14: Saacada gudaha ah


Fiiri wajiga saacada oo ka fakar waxa kuu noqonayo waqtii wanaagsan ee adiga aad sariirta kortid oo aad subax walba ka kacdid. Xasuuso in waqtiga hurdada guud uusan dhaafin 8 saacadood. Si loo helo nidaamyada hurdada ee gadaasha sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah, qorshaha **kaliya 6 saacadood** ee huradada ee bilowga. Markii taasi ay si wanaagsan u socoto, si tartiib ah u kordhi waqtiga hurdadaada illaa 6.5, kadib illaa 7 saacadood.

Waxaad ka heleysaa tusaalaha hoos, iyo saacada xigto waa iqtiyaarkaaga, ajendaha hurdada gaarka ah!



Tusaale:

Waqtiga jiifka 11pm illaa 6am



Waqtigeyga hurdada gaarka ah:


Waqtiga sariirta: \_\_\_\_\_

Waqtiga kacitaanka: \_\_\_\_\_

Tani waxay shaqeyneysaa kaliya marka aad isku daydid inaad joogteysid ajendahaaga **maalin walba** inta lagu jiro isbuucyada xiggo. Xittaa haddii aysan hurdo ku qaban karin isla markaas oo aad daalantahay marka aad kacdid subixii, joogtey iyada! Waa muhiim in la kaco isla waqtiga oo waxad ogaaneysaa in dhaqanka dhab ahaantii wanaag sameeyo. Waxaa la maqli karaa bilowga sababtoo ah waad daalantahay inta lagu jiro maalinta, laakin taasi yaysan ku niyad jabin. Joogteynta!

Si gaar ah ayay muhiim u tahay in **AANAN** la seexan inta lagu jiro maalinta, dhibaato malahan sida aad u daalantahay. Hurdada inta lagu jiro maalinta waxay ka dhigeynsaa kaliya mid aad u adag si aad u joogteysid ajendahaaga sababtoo ah markale ma daalanid habeenka marka ay tahay waqtiga la seexanayo. Xiriirka sida waafaqsan daalka inta lagu jiro maalinta way sahlineysaa in la seexdo habeenka.

**Sharciga # 1 Ha seexan inta lagu jiro maalinta!**



Sharci kaloo muhiim ah:

**Sharciga # 2: Sariirta kaliya waa hurdada!**

Tababar maskaxdaada iyo jirkaaga si aad ugu xirtid sariirtaada hurdada. Kaliya hoos seexo ee sariirta marka ay tahay waqtiga hurdadaada. Haku isticmaalin sariirtaada dhageysiga muusiga, sameynta shaqada guri, qorista waraaqaha ama howlaha kale. Iska hubi inaad meel kale heshay oo aad waxyaabahaan ku sameysid.



**Sharciga # 3: Isku day inaad buuxisid maalmahaaga ee leh howlaha jirka ama ciyaaraha!**


Gubista tamarta waa qaab wanaagsan ee lagu caawinayo inaad daal dareentid habeenkii! Si ay kaaga caawiso inaafd si wanaagsan u seexatid, samey ugu yaraan 30 daqiiqo ee ciyaaraha maalin wlaba.



#### Sharciga # 4: U diyaari jirkaaga hurdada labo illaa sacad saacadood ka hor waqtiga hurdada la aadayay!

Tani waxay lka micna tahay:

- **Ma jiraan ciyaaro** labo ama sadex saacadood ka hor ajandaha hurdadaada ay bilaabato. Ciyaaraha wuu xoojiyyaa oo firfircooneysiyyaa, ku daalinayo wax badan hadhowdii.
- Ka hor inta aadan hurdo aadin **ha u cunin wax badan, cuntooyinka badan**, sida ay ku siiyaan calooshaada shaqooyin aad u badan ee sameynayo, in jirkaaga uusan si ku haboon u nasan karin.
- **Ha u daawan si aanan la hubin filmada** sida filmada ficiilada ama cabsida, ama dhageysiga **muusiga dhawaqa dheer, ee dheeraanaya**. Farkada waxay ka ilalaisa ahurada muddo dheer!
- **Ma jiro shaah madow, koolo, kafeega ama cabitaanada enerjiga!** Dhammaan cabitaanadaan wuxuu wataa kafeega oo hurdo la'aan kugu hayo! Cabida **qamriga** ee maqriba sidoo kale waxay kicisaa nidaamka neerfaha, iyada oo adkeyneyso inuu seexdo. Isla sidaas ayay quseysaa tubaakada **sigaarka**.
- **Howlaha isdajinta** ee nmaqriba labo ama sadex saacadood ka hor inta aadan hurdada aadin. Tusaale ahaan, daawashada filmaan baashaal ah, dhageysiga ee muusiga dabacsan, ku dhaqmida erayada Jarmalka ama buuxinta ee nasiinyada sawirka **sida mid ka mid ah sawirada ee Jimicsiga 8, Sadarka 2.5.**



#### Sharciga # 5: Aasaas dhaqanka habeen wanaagsan!

Iyada dib loo qaabeynayo ajandaha hurdada, waxad si dheeraad ah u taageeeri kartaa jirkaaga adiga oo aasaasayo dhaqanka aad sameysid habeen walba isl waqtiga. Dhaqnaka, tusaale. wax aad ku celisid, maqtib walba, u diraa siinyaalo maskaxda iyo jirka, u sheegayo waa waqtigii la seexanayay. Waxaa laga yaabaa inaad dhaqan noocas ah la yeelatahay marka aad carruur aheyd? Maxay dhaqankaan hadeer noqon kartaa? Halkaan waa dhoor soo jeedin: mareenada aqrinta ee Quraanka ama Baybalka, cabida caano qandac ah iyo malab (hurdeysiga dabiiciga ah), qorista xasuus qorka xiliyada wanaagsan (**fiiri Jimicsiga 12, Sadarka 2.6.1.**).



Dhaqankeyga habeenkeyga gaarka ah ee wanaagsan:

---

### 3.1.2. Nasinta jirkaaga

Hadeer, waxaad ku jiiftaa sariirta ee waqtiga ajandaha hirdada gaarka ah oo weli hurdo ma qabaneysyo. Qalab cajib ah waa nasinta jirkaaga oo kacsan. Labada jimicsi ee xigo waxay kugu caawin karaan inaad midaan sameyisid. Dooro mid ka mid ah jimicsigaan oo si joogto ah u samey. Xittaa haddii aysan shaqeeyin waqtiga ugu horeysyo, joogtey jimicsiga. Ha iloobin, tababarka joogtada ah inay kuu keento hadafkaaga!

#### **Jimicsiga 15: Jimicsiga neefsiga**

Neefsiga waa laxanka aasaaska jirka. Saameynada xiisaha ee laxankaan iyo saameynada xiisaha laxanka! Markii aan murugno, neefsigeena wuxuu noqdaa mid dheereeyo oo god ah. Tani waxay quseysaa heer hooseeyo CO<sub>2</sub> ee dhiiggeena ku jiro, taas oo badelkeeda naga dhigto nasiinyo la'aan iyo jahwareerka. Si tartiib ah hoos ugu naso heerka murugada sida heerka CO<sub>2</sub> kordho markale. Tani waxay nagu caawisaa inaan dib u helno wax yar dafanaanshaha. Dad badan oo dadka ciyaarahaa si tartiib ah ayay u jiidaan iyaga oo aan ogeyn xaaladaha murugada ama dhibka jirka. Qaabka neefsigaan wuxuu u baahanyahay dhaqanka qaarkood, maadaama aan caadi ahaan u jiidno wax badan, ama xittaa neefteena celino marka aan murugeysannahay.


Inta lagu jiro tababarkaan, waad xiri kartaa indhahaaga ama diirada saareysaa hal fikrad ee saqafka.

Isku day inaad garatid laxanka neefsigaaga iyada oo aan jirin isbadel wax walba.

Kormeero neefsigaaga iyo banaan u neefsiga. Wuxaa gacantaada ku jiifin kartaa calooshaada oo aad dareentid inay kacdo marka aad neefsatiid oo dhacdid marka neefsatiid. Bilow inaad xisaabisid neefsiyadaada; gudaha iyo banaanka, 'kow'; gudaha iyo banaanka, 'labo'. Tani waxay kugu caawineysaa inaad diirada saartid neefsigaaga iyada oo aan jirin dabagalka dhinacaaga ee afkaaraha iyo xasuusaha.

Hadeer, isku day inaad wax badan si qoto dheer u neefsatiid. Si tartiib ah oo qoto dheer uga neef qaado

sankaaga, si markaas calooshaada u kacdo si sareyso, oo ka neefso afkaaga illaa dhammaan neefta ay baxdo oo calooshaada sinnaato markale. Kadib, samey hakin yar inta aadan gudaha u neefsan. Waad xisaabin kartaa illaa sadex, iyo kadib gudaha u neefso mar kale sida tartiibka ah oo qotoda dheer dhinaca sankaaga, oo kadib banaanka uga neefso afkaaga, haki, (1, 2, 3) kadib sii wad. Marka afkaaraahaaga bilaabaan inay tartiib u qaataan, si sahlan ugu soo laabo diirad saarida laxanka neefsigaaga. Markii afkaaro xun ama xasuusyo yimaadaan, banaanka ugu neefso si xoogan. Ku soo dir iyaga banaan u neefsi xoogan ama xittaa sare ugu qaad. Wuxuu sidoo kale isticmaali kartaa garbahaaga iyo gacmahaaga si aad iskaga riixdid afaakaraha iyo xasuusaha adiga oo neefsanayo. Qaabkaan, laakin weli joogteynaya laxanka neefsigaaga, iska riix dhammaan walaacyada oo ka cabso in ay kordhi karto.



Iyo banaan u neefsi walba, dareemo badan oo badan wuxuu ku reebaa jirkaaga oo waxaad noqotaa qof aad u dabacsan. Isku day inaad dareentid nasiinyada jirkaaga. Waxaad joogteyn kartaa tababarkaan illaa aad ka seexatid ama haddiiba aad jeceshahay.

#### **Jimicsiga 16: Nasiinyada muruqa oo hormarayo**

Nasiinyada muruqa oo hormarayo wuxuu ku saabsanyahay dareemida kala duwanaanshaha u dhaxeeyo markii xiisaha iyo nasiinyada, iyada oo la isticmaalayo howlaha jirka si loo gaaro nasiinyada jirka iyo maskaxda. Nin lagu magacaabo Jacobson ayaa hormariy qaabkaan. Qaabka wuxuu ku lugleeyahay si ula kac ah u dhujinayo kooxyada muruqa qaarkood. Markii murqaha kadib la sii daayo, kooxda aad ayay uga dabcaan wax ka badan sida hore. Waxaad ku sameyn kartaa jimicsigaan adiga oo hoos jiifo ama kor fadhiyo.

**Kor fadhiga:** Kor ugu fadhiiso gadaal korsiga. Madaxaaga waa kordhinta laf dhabartaada, garkaaga ayaa si tartiib ah kor loogu qaadaa. Garbahaada way dabcaan. Labada cagoodba si adag ayaa dhulka loogu beeraa.

**Hoos jiifsiga:**

Dareen madaxaaga oo ku jiifo barkinta. U ogolow garbahaada inay dabcaan oo ku seexi garbahaaga jirkaaga akktiisa. Dareen sida ay u quusiyaa joodariga. Lugahaaga waa lakala bixiyaa, ugu jiifo si simman joodariga oo iskala bixiyay.

Gudaha iyo banaanka uga neefso calooshaada si qoto dheer oo dagan. Wawaad ku seexan kartaa gacmahaaga calooshaada, dareenka way koradhaa oo dhacdaa.

Waqtiga xiggo ee aad jeedid, samey feer adag ee gacmahaaga, qalooci garbahaaga ee 45° xagal oo ka kacsan **gacmahaaga iyo garbaha** oo ay la jirto dhammaan kartidaada. U riix garbahaaga kore si ku dhuuqsan dhinacyahaaga. Qabo xiisaha qiyaastii 5 ilbiriqsi, gudo u neefsiga iyo banaanka labo jeer ee waqtigaan ah. Jiidista xigta waxay siideysaa xiisaha gacmahaaga iyo garbaha oo qiyaastii 10 ilbiriqsi. Isku day inaad dareentid kala duwanaanshah u dhaxeeyo xiisaha iyo siideynta. Hadeer ku celi wareega oo dhan hal jeer oo kale.

Diirada ku saar hadeer **gacmaha kore iyo garbaha**. Iyada oo gudaha loogu neefsanayo si dhuuqsan muruqa gacanta, murqaxa fadhiba gacanta iyo garbaha. U qabo xiisaha hore si aad u dhuuqsan 5 ilbiriqsi, oo ku kordhinayo garbahaaga dhagahaaga. Siidaa xiisaha oo naso ugu yaraan 10 ilbiriqsi, ogaanayo kala duwanaanshaha u dhaxeeyo xiisaha iyo siideynta. Hadeer ku celi wareega oo dhan hal jeer oo kale.

Mida xigta waa **wajigaaga**. Dhuuji murqaha wajigaaga, weersheey indhahaaga, kor u wareeji sinkaaga, isku qabo ilkahaaga oo si kala baxsan ukala fur afkaaga. Qiyaas adiga oo qaniinay liimo. Ogow xiisaha, neefsiga gudaha iyo banaanka labo jeer adiga oo hayo xiisaha. Neefsiga labaad ee xigga, siiddaa xiisaha. Dareen wajigaaga oo noqonayo mid simman. Qeypta wajiga hore, indhaha, sinka, dhabnaha, afka, iyo daanka si buuxdo u dabacsanyahay. Hadeer ku celi wareega oo dhan hal jeer oo kale.

Ma ahan in la wareejiyo **saxamada garbahaaga iyo gadaasha**. Gadaal u jiid garbahaaga sida adiga oo rabo inaad isu keentid saxamada garbahaaga. Garkaaga hoos ugu jiid xabadkaaga, adiga oo kala bixinayo laf dhabartaada si aad u dheer. Qabo xiisaha 5 ilbiriqsi, gudo u neefsiga iyo banaanka. Neefsiga labaad ee xigga, siiddaa xiisaha. Ogeysiinta kala duwanaanshah u dhaxeeyo xiisaha iyo siideynta. Hadeer ku celi wareega oo dhan hal jeer oo kale.


Hadeer si adag kula qabo **dabadaada** si wadajir ah xiisaha. Siidaa oo dareen kala duwanaanshaha. Hadeer ku celi.

Qaado neefsi qoto dheer oo gudaha ku qabo, adiga oo dhuujinayo murqaha **calooshaada** sida iyaga oo rabo inay taabtaan laf dhabartaada. Daji xiisaha oo ogow kala duwanaanshaha, Ku celi.

Hadeer dhuuji dhammaan murqaha **lugtaada** oo labada lugoodba ah, adiga oo kor ugu qaadayo iyaga wax yar ee joodariga. U jiid suulashaada dhinacyada bowdyahaaga oo dareentid xiisaha ee bowdiyaha, kubka iyo cagta. Siidaay xiisaha oo ogow kala duwanaanshah. Ku celi.

Ugu dambeyntii, isku qabo **suulashaada**. Qabo xiisaha, siideynta oo dareen kala duwanaanshaha. Ku celi.

Hadeer ogow ogeysiinta nasiinyada oo illaa jirkaaga oo dhan. Dareen tayada, calool xumo yar iyo raaxada.



### 3.1.3. Nasinta maskaxdaada

Haddii nasiinyada jirkaaga aysan ku fiilneyn inay yareyso afkaarahaaga, waxaad dooran kartaa mid ka mid ah sida xigta ee tababarka. Miyay jiraan aaminaada guud ee dhaqankaaga ee lagu caawinayo dhaqankaaga ee aad jiifatid? Gudaha Germany, waxaa la dhahay in qiyaas inay caawiso jimicsiga maskaxda. Qiyaas idaha wada socdo oo u xisaabi sida ay yihiin, midba midka kale, ka bood deyrka. Tani waxaa la dhahaa waxay caawisaa inay joogteyso afkaaraha diirad saarida dhibaatooyinka laga yaabo inay ku soo jeediyaan.

#### Jimicsiga 17: Taabashada madaxa iyo wadnaha

Is wada saar calaancasha gacmahaaga, qaadayo gacmahaaga oo wax yar qalocinayo madaxaaga si markaas fiidaha farahaaaga si tartiib ah u taabtaan dhexdha foodaada, ee ka koreyso sunnayaasha indhaha. Gadaal u fakar wax walba aad kula kulantid inta lagu jiro maalinta la soo dhaafay. Waaya aragnimadee ayaad ku qanacsantahay? Haka rajo beelin! Waxaa marwalba jiro wax aad ku qanacdid, xittaa markii ay si sahlan u tahay xaqiqida aad maalintii badbaad!

Markii aad heshid wax kuu keeno mahadcelin, xasuustaan ha soo noolaato iyo dareenka xoogan ee maskaxdaada. Hadeer gacmahaaga ku seexl wadnahaaga oo samey afuuf yar. Mahadsanid!



Saynisyahanka waxayogaadeen in xasuusaha mahadcelinta ay uga soo baxaan dareemo wanaagsan ee qeyb maskaxdeena ee la xiriirto dareemaha. Dareemahaan wanaagsan waxay durbadiiba soo saaraan oo soo diraan fariimaha hurdada u keento qeybaha maskaxda.

Haddii aad joogteysid Buugga Raaxada (**fiiri Jimicsiga 2, Sadarka 2**), waxaad ku sameyn kartaa jimicsigaan kadib markaad gashid waaya aragnimo wanaagsan ee maalinta ah.

#### **Jimicsiga 18: Gaarkeyga, gaar ah, meel nabad ah**

Meel gudaha ah waa **meel sawir ah** halkee ayaad ku dareentay badbaado, wanaagsan oo dagan. Jimicsiyadaan iyo muuqaalka la midka ah waxay caawisay malaayiin dad ah si loo yareeyo xiisaha iyo nasiinyo la'aanta. U sameynta si joogto ah jimicsigaan waxay tixraacaan dareemaha nasiinyada iyo fao qabka. Xasuuso - afkaarahaaga awood ayay leeyihiin! (**Sadarka 2.1.**)

Ku bilow diirad saarida neeftaada. Si qoto dheer ah dhinaca sankaaga iyo banaanka dhinaca afkaaga, la faarujinayo sambabkaaga si buuxdo. Nafsadaada ha nasato. Hel laxanka neefsigaaga gaarka ah.

Hadeer muuji meesha isha maskaxdaada. Meesha halka aad ka dareentid badbaado oo aad daryeeshid. Meel halka aad ku nasan kartid gabii ahaanba. Meeshaan waxay noqon kartaa meel aad dhabitii horay u joogtay ka hor ama meesha kaliya ka jirto qiyaastaada. Waqtigaaga qaado. Waa suurtogal in dhoor meelood maskaxdaada soo gasho.

Laga yaabo inaad inta badan dareentid guriga ee meel dabiici ah, sida xeebta, ama duurka, ee goobta ubaxa ama gudaha buuraha. Laga yaabo meeshaada nabada gudaha waa guriga dhexdiisa, ee booska markabka hawada ama godka....

Markii aad go'aansatid meesha, fiiri agagaarka kuu dhow.

**Maxaad aragtaa?** Waxaa adiga kugu dhow? Sida waafaqsan iyo korkaada? Midibahee halkaas ah?

**Maxaad maqashaa?** Dhageyso raaxo gelinta iyo dhawaaqyada raaxada ah. Laga yaabo dabeysha way afuufsameysaa ama ka dhawaaqeysaan dhinaca wadada duurka? Miyay jiraan shimbiro heesayo? Miyay jiraan dhawaaqa biyaha socdo?

**Maxaad dareentaa?** Maxaad ku dareentaa maqaarkaaga? Maxaa ka hooseeyo cagtaada? Meesha miyay diirantahay ama raaxo ahaan qabowbantahay? Dhulka ma qafiifbaa ama adagyahay? Cowska ama ciida miyay xanta xanteeyaan cagta? Dabeysha miyay ku ciyaartaa timahaaga ama miyaad dareentaa diirnaanta quraxda ee maqaarkaaga?

#### **Maxaad urineysaa?**

Miyay jiraan **dhadhan** gaar ah ee carabkaaga?

Miyay jiraan noolayaal kale ee ku jiro meeshaada ee nabada gudaha? Dadka ama xaywaanada? Maskaxda ku haay, illaa, in **kaliya kuwa leh ogolaanshahaaga** loo ogolyahay inay meeshaan imaadaan! Tani waa shaqsigaaga gaarka ah, gaarka, meel nabad ah, oo adiga kaligaaga go'aansatid kee ama waxa ka imaan karo halkaas. Ogaanshaha cida halkaas joogto oo dareemaan xiriirk idin dhaxeeyo. Miyay jiraan wax kale ee aad ka jeclaan laheyd meeshaan? Laga yaabo busto jilicsan, xayawaanada dufeysan, wax dhadhamayo in la cuno ama muusig qorxoon.

Waqtjoog meeshaada qurxoon, gaarka ah, nabad ah, ku raaxeyso xasiloonida iyo nabada adiga kugu haraareysan. Ku qoy jawiga raaxada leh. Wuxaad dareentay raaxo gabii ahaanba oo dagan. Haddii aad jeceshahay, hoos ayaad u dhaqaaqi kartaa oo ku qaado hurdo gabaan halkaan...

Laga yaabo inay jiraan sawir (**fiiri Jimicsiga 3, Sadarka 2.3.**) ee ku xasuusiyo shaqsigaaga, meeshaada gaarka ah, nabadna ah? Ama waad sawiri kartaa sawirka nafsadaada.

Sur sawirka meeshaada gaarka ah, meel aamin ah meeshaas oo aad ku arki kartid sariirtaada. Tani waxay kugu caawineysaa inaad dib u heshid wadadaada marwalba oo aad rabtid inaad halkaas ka aadid. Haddii mobeelkaaga uu leeyahay intarnet, wuxaad heli kartaa muusiga dhawaqa nasiinyada leh YouTube, sida heesta shimbirka duurka ama durdurka hadaaqida, kaas oo, haddii uu kugu haboonaado, lagu dhageysan karo dhinaca mobeelada marka aad booqatid meeshaada gaarka ah, nabada ah. Tani waxay si suurtogal ah kuugu taageeri kartaa qiyaasida u aragtida meeshaada si cad.

Inta badan ee aad qiyaastid oo aad ku isticmaashid waqtjoog meeshaada gaarka ah, nabada, sida sahlan ee ay noqoto in halkaas la aado iyo sida dhaqnsida ah ee badan ee saameynsteeda nasiinyada celiso.

#### **Ogeysiin:**

Wuxaad heleysaa feelka dhageysiga (MP3) halkaas oo aad dhageysan kartid jimicsigaan oo luuqado kala duwan ee intarneetka sida waafaaqsan:

<http://www.refugee-trauma.help/selbsthilfe-fuer/traumatisierte-menschen/>

*Jimicsiga waxaa loo yaqaan "Ort der Geborgenheit"*

Haddii aad kacdid habeenkii oo aadan ku laaban karin hurdada, wuxaad ku celin kartaa jimicsiga kore. Marka taasi aysan ku caawineynin inaad dib ugu laabatid hurdada, ha isku dayin inaad qasabtid. Kac oo samey wax aad ku nasatid waqtjoog meeshaada gaarka ah, nabada, sida sahlan ee ay noqoto in halkaas la aado iyo sida dhaqnsida ah ee badan ee saameynsteeda nasiinyada celiso.

### **3.1.4. La kulanka dhaqtarka iyo daawooyinka hurdada**

Markii aad isku daydid dhammaan jimicsiyada si joogto ah dhoor isbuuc – xasuuso, kaliya dhaqanka wuxuu badeli karaa laxankaaga hurdada! – iyo waxaad weli qabtaa dhibaatada hurdada, kadib waa waqtiga loogu booqanayo dhaqtarkaaga. Dhaqtarka ayaa go'aansanayo haddii lagu talin karo in la qoro daawada kugu caawineyso hurdada. Kaniiniyada hurdada waxay noqon kartaa balwad oo kaliya waa in loo qaadaa sida lagu qoray, iyo marnaba ha is barbardhigin qamriga ama daroogada. Inta badan, way ku filantahay in la qaato kaniiniyada hurdada ee habeenkii ama labo illaa laxanka hurdadaada si caadi ah loogu celiyo. Waa inaad kadib joojisaa daawada looga fogaanayo inaad ku tiirsanaatid.

### **3.2. Qarowga**

Qarowga waa riyooinka keenayo cabsi xoogan, murugada iyo kiraahiyada. Sida caadiga ah, dareemaha xoogan ee qarowga waxay noo luxaan habeenkii. Qarowga inta badan waxay imaataa barka labaad ee habeenkii, oo waxay ahaan laheyd dhacdi caadi ah. In ka badan bar ka mid ah dadka weyn ee qarowga mararka qaar, iyo boqolkiiba 5% waxay qabaan qarow joogta ah.

Waxyaabaha dhabtii naxdinta leh ee ka dhaco qarowga, dilka, hanjabaadaha ama dhimashada. Mararka qaarkood waxaan ku ryoonaan waxyaabaha sida waxa aan la kulanay. Laakin waxa sidoo kale si buuxdo ugu ryoonaan xaaladaha aanan caadiga aheyn, sida bahalada ama ajaanibka ku ah. Mararka qaar riyooinkeena waxay dhacaan mustaqbalka. Kadib waa muhiim in la ogaado in riyooinka aysan arki karin mustaqbalka.

Ma qabtaa qorow? Imisa jeer isbuucii?

Maxay ku saabsanyihii dariskaaga?

Miyay dib u dhacayaan riyooinka ama qarowga la midka ah?

### **3.2.1. Wuxuu la sameeyo marka aad ka kacdid qarowga**

Marka aad qabtid riyada xun, ama adoo soo jeedo naxeysid, waa muhiim inaad si buuxdo u kicisid nafsadaada oo dhammaan 5 dareemo, ku noqoneysid hadeer. Tani waxay kugu caawineysaan inaad ogaatid, “**Waxay aheyd kaliya riyo, waxaan ku jiraa qolkeyga ee ku yaalo Jarmalka HADEER!**”

Taasi mar walba ma ahan sida sahlan ee ay u muuqato sababtoo ah qarowga wuu ku jahwareerinayaa oo luminayo, iyo goortii aan kacno, ma garaneyno isla markaas halka aan joogno. Sidaas darteeda, caawin ayay leedahay in la aruuriyo dhoor xasuusiyayaal ee sariirtaada ah ku soo xasuusiso inaad joogtid Jarmalka.

Xasuusahaan waxaa loo yaqaan **daereenka hadeer ku xiran**, nolosha **Hadeer iyo Hadhow**. Maxay xasuusinadaan kuu noqon karaan adiga?

Laga yaabo inaad leedahay dhoor sawiro ee ka imaanayo dhacdooyinka raaxada ah ee halkaan ee Jarmalka ee aad kor suri kartid agagaarka sariirta? Ama waxaad sawiri kartaa calanka Jarmalka oo qor ‘waxaan joogaa Jarmalka!’ hoosteeda, oo saar sariirtaada. Laga yaabo inaad dhagax leedahay ama qolof ee miiskaaga? Gacantaada ayaad ku qaadan kartaa marka aad riyo ka kacdid.




Waa muhiim inaad aragtid xiisahaaga hadeer ku xirmo isla markaas marka aad kaccid. Wuxaad ku dhajin kartaa saqafka ka koreeyo sariirtaada. Kadib, marka aad ka kaccid dawaqsanaan oo aad ku dareen la'dahay riyada xun oo aadan dhqaqaqi karin, indhahaaga arkaan ku xirnaanta isla markaas! Dareenkaan dareen la'aanta ayaa ku yimaado cabsi xoogan ee riyada sababtay, muddo dheer ma socoto. Waad ku luxi kartaa dhaqdhqaqaq yar, sida il jabinta ama qaloocinta hal far ama suulka. Dhaqdhqaqaqa yar wuu caawiyaa, kadib guuritaanka tartiibka ah ee gacantaada oo dhan ama cagta illaa dareen la'aanta ay jabto oo aad dhqaajin kartid jirkaaga oo dhan.

Dad badan ayaa u arko in kacitaanka iyo cabida galaas biyo ah ama iskaga shubida biyo qabow wajiga waxay kugu caawisaa kacitaanka oo aad ku soo laabatid Halkaan iyo Hadhow!



Jimicsiga iskala bixinta sahlan sidoo kale waxay kugu caawisaa inay dib kugu soo celiso xiisaha hadeer.



Wax ku dheh nafsadaada sida, “**Waxaan ka mid ahay hadeer. Wax walbo oo igu dhaco, hadeer way dhamaadeen! Afkakeyga, lugaheyga, qalbigeyga, dhagaheyga, iwm. Waa halkaan, hadeer.**”



Dadka qaarkii waxay u arkaan bogasho hoos ku qorida riyada xun iyo kadib boggag u kala goynayo oo tuurayo. Jimicsiga yar ee xigga wuxuu kugu caawinaya kadhigida badelka marinka, dareenka caawin la'aanta dareenka qarowga firfircoon ee dhacayo.

#### **Jimicsiga 19: Tuurida garabka**

Gacantaada kor u qaad, adiga oo kala bixinayo gacmahaaga iyo faraha. Dib u booqo sawirada qarowga oo qiyaas ku meeleynta sawiradaan iyo dareemahaan mid ka mid ah gacantaada. Hadeer, ku tuur tusmooyinka riyada gadaasha garabkaaga. Dhacaanka dhaqdhaqaqa tuurida ee hortaada ee gadaashaada. Iska tuurida qarowgaada! Hadeer samey isla sida gacan kale. Ku celi dhaqaaqaan oo hal gacan ah iyo kadib mida kale, markale iyo markale illaa gacmahaaga si buuxdo loo faarujiyo oo qarowga uu baxo.



Ku badelida dhaqaaqa midig iyo bidix dib ugu xir qeybaha maskaxdaada inaan aamusino inta lagu jiro waaya aragnimadaada naxdinta. Howsha jirkaan waxay ku siineysaa awooda si FIRFIRCOON uga hortagta caawin la'aanta qarowyada. Dhaqaaqa jirka ayaa u diro siinyaalo muhiim ah maskaxdaada.

Dib ha ugu laaban sariirta isla markaaba, laakin wax kale samey muddo gaaban. Waad dhageysan kartaa muusiga nasashada, aqri, sawir ama samey jimicsiga kala baxa. Kaliya marka aad bilowdid inaad dareentid hurdeysi markale, kadib ku laabo sariirta. Si lagaaga caawiyo inaad hurdoodid, waxaad sameyn kartaa **Jimicsiga Neefsiga 15, Sadarka 3.1.2.**


Waa macquul in “dib loo jaheeyo” riyooyinka xun marka ay naxdin geliyaan kicitaanka adiga oo qiyaasayo in dadka caawinta lehama xayawaanada farageliyaan ama inaad ka adkaato dhibaatooyinka ee leh awoodaha gaarka ah. Noqo agaasimaha riyadaada gaarka ah! Nefsadaada geesi ka dhig! Adiga oo badelayo qoraalka qiyaastaada, waad adkaan kartaa cabsida iyo caawin la'aanta ay sababtay qarowga.

Mararka qaar way adagtahay in dib loo jaheeyo riyooyinkaaga kaligaa. Haku caawiyo qof qaba waaya aragnimo yar. Weydii jaheeyahaaga ama qofka ku siiyaa buugaan.

### **3.2.2. Ka hortaga qarowga**

Cilmi baaraayaasha mar walba ma ogadaan waxaa iyo sida ay wax noo caawiyaan. Laakin waxaa jiro xigmad qimo leh oo dhaqamo badan ah ee ka imaanayo qarniyada waaya aragnimada. Dhalad Mareykanka ayaa abuuray ‘daawo’ la dagaalanto qarowga ee loo yaqaan *riyo qabtaha*. Fiiri sawirka mid ka mid ah. Dhaladka Mareykanka ayaa kuwaan u sameeyay nafsadooda. Riyo qabtaha waxaa loogu talo galay inuu ka illaaliyo dadka ryooyinka xun. Ryooyinka xun waxaa lagu qabtaa qaribin, iyada oo dhagaxa xarunta u ogolaanayo ryooyinka wanaagsan oo ku soo maartaa.

Riyo qabtaha weli wuxuu u aamusanyahay si caan ah maanta ee Mareykanka iyo illaa Yurub. Waxay ku laalanyihii sariirta ama daaqada qolka iyo dad badan ayaa lagula taliyay wuxtarkooda.



Miyay cibaadeysiga ama daawooyinka dhaqankaaga ku jiro ka caawisaa leexinta qarowga?

### **3.3. Dib u xasuusashada, xasuusaha/sawirada xun ee soo noqnoqanayo iyo la jiritaanka dhinacaaga**

#### **3.3.1. Dib u xasuusashada**

Markii xasuusyo waaya aragnimada naxdinta noqoto mid aad u xoogan oo aad dareentid dhacdooyinka naxdinta inay hadeer dhacayaan, kuwaan waxaa loo yaqaan *dib u xasuusashada*. **Sadarka 1**, waxaad wax ka aqrisay sida dib u eegidaan ugasoo baxaan. Inta lagu jiro dib u eegida, maskaxdaada kore way dantaa markale oo markale ma ogid halka aad ka joogtid jadwalka waqtigaaga. Haddii aad eegtid jadwalka waqtigaaga markale **Sadarka 1.3.**, waxaad arkeysaa in dib u eegida ay ka mid tahay mid la soo dhaafay. Waaya aragnimada kala duwan waxay ku caawineysaa maskaxdaada kore inay dareen keento ee dib ugu socdo Halkaan iyo Hadeer, helida baaxada ka imaaneyso dhacdooyinka waqtiga la soo dhaafay; ee ka imaanayo dareemaha buux dhaafa ee ku xiran dhacdooyinka la soo dhaafay.

Waa inaad jimicsiga si joogta ah ugu sameysaa iyaga si ay waxtar u lahaato, ma ahan kaliya marka aad la kulmeysid dib u xasuusasho. Jimicsiga waa inuu si toos ah u imaadaa, kadib waxay kugu caawinayaan xaalada daran, tusaale ahaan inta lagu jiro dib u xasuusashada. Tababarka way wanaajisaa, waa maahmaah Ingiriis caadi ah. Ma leedahay maahmaah luuqadaada ah ee muujisaa isla afkaarta?

#### **Jimicsiga 20: Dareemaha madadaalada**

Qiyaas waxaad qaniineysaa basbaas aad u kulul. Sidee ayay taasi dareentaa? Aad ayay u basbaasantahay in afkaaga gubto iyo indhahaaga ilmeeyaan? Ma ku fakeri kartaa wax kale hadeer markii laga saaro afkaaga gubanayo? Malaha ma ahan! Maskaxdaada gabii ahaanba waxaa lagu dhuuqay afkaaga. Wax walba ee kale waa mid labaad.



Iyo si hufan habkaan waxtar ayuu kuu noqon karaa! Markii xasuusaha dib kaa bataan ama markii aad dhinac ka tahay nafsadaada oo aad dareentid sida in aadan ku jirin jirkaaga gabii ahaanba. Kicinta xiisaha wuxuu carqaladeeyaa labadaba!

Waad baran kartaa inaad kicisid hal ama wax ka badan shantaada dareen ee xaalad noocaas ah! Ahow sida aasaaska aad jeceshahay marka aad tixgelineysid kicintee ayaa kuu wanaagsan adiga iyo dareemahee ayaad jeelaan laheyd inaad kicisid.

Halkaan waa dhoor fikradood. Kee baad jeelaan laheyd inaad isku daydid? Laga yaabo inaad heysid fikrado badan oo wanaagsan? Dooro hal ama labo fikradood ee la isku dayo dhoorka maalmood ee xigo.



- Qabashada dhagax qolfeysan
- Ku dhufo gacmahaaga gabalada barafka ah ama biyo qabow, ama qaado qubeys qabooban
- Ku jabi faashada goomaha curcurkaaga
- Qanjaruufo maqaarka u dhaxeeyo suulka iyo tilmaamaha



- Urta qalka
- Urta barfuunka ama saliida dhirta



- Dhuuq nanacyo dhannaan ah ama dhibcaha dhirta
- Calaali miraha beeriga qalalan
- Ku qaniin liimada ama basbaaska kulul



- Ciyaar dhawaqyada qeylida ee mobeelkaaga
- Yeei gambaleel yar
- Daar muusig dhawaq dheer



- Fiiri sawirka la xiriiro afkaaraha wanaagsan
- Magaca waxyaabaha qolka ku jiro ee leh, tusaale ahaan, isla midibka

Kuwaan waa waxyaabaha aan isku dayayo:

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

### **Jimicsiga 21: Jimicsiga 1-2-3-4-5**

Jimicsigaan waa wado u sahan inay dib u keento dareenkaaga Halkaahn iyo Hadeer. Wuxaan ku sameyn kartaa meel walba iyo xili walba. Sidoo kale way wanaagsantahay wax ka soo horjeedo jahwareerka, cabsida iyo xiisaha.

Tababarka koowaad jimicsigaan caadi ahaan, xaaladaha maalin walba markii aad midkood xiisaha ku jirtid ama ka hor imaanshaha ee leh dareemaha xun. Waa inaad ogaataa in jimicsiga aad u wanaagsanyahay, kaliya goorta ay kuugu caawineyso waqtiyada adag. Waxay kugu caawineysaa inaad dib u heshid xakameynta nafsadaada oo ma ahan buux dhaafa afkaaraha iyo dareemaha xun. Shey ugu wanaagsan waxay noqoneysaa barashada jimicsiga 1 illaa 3 jeer maalintii oo caadi ahaan, xaalado walba.

Bilow jimicsiga adiga oo **magacaabayo shey** ee aad **aragtid** hadeer. Tusaale ahaan, "waxaan arkaa gaark wadid gaduudan ee."



Kadib, **magacow sheyga** aad **maqashid** hadeer. Tusaale ahaan, "waxaan maqlaa dad hadlayo."



Kadib, **magacow sheyga** aad **taabaneysid** hadeer. Tusaale ahaan, "waxaan ka dareemaa dhinaca hoose ee gacanta nasashada korsiya."



Hadeer, magacow 2 shey oo aag walba ah.

**2 shey aad aragtid**

**2 shey aad maqashid**

**2 shey aad dareentid**

Ku sii soco hadeer 3 sheeyo.

**3 shey aad aragtid**

**3 shey aad maqashid**

**3 shey aad dareentid**

Kadib 4 sheeyo,


**4 sheeyo aad aragtid, maqashid oo aad dareentid.**

Ku dhamey **5 sheeyo qeyb walba.**

Haka walaacin haddii aad lumisid xisaabinta, sii soco kaliya. Sidoo kale, waxay dajisaa dhammaan waxyaabaha ku celinta ee aad aragtid, maqashid iyo dareentid.

Jimicsigaan wuxuu sidoo kale kugu caawin karaa **inaad hurdoodid**. Xaaladaas, samey jimicsiga gadaal, hoos u xisaabinta ka bilow **5 shey aad arki kartid, maqli kartid oo aad dareemi kartid, illaa 4 sheeyo, illaa 3 sheeyo, illaa 2 sheeyo iyo 1 ugu dambeyntii, illaa 1 shey aad arki kartid, maqli kartid oo aad arki kartid.**

Markii aad nafsadaada si guul ah dib ugu keentay Halkaan iyo Hadeer oo aad ogaatid in xasuusaha ka midka ah mida la soo dhaafay, muhiim uma ahan inay dajiso dareemaha buuxo. **Jimicsiga 15 (Jimicsiga neefsiga) iyo 16 (nasiinta muruqa hormarayo) ee Sadarka 3.1.2.** aad ayay waxtar u tahay. Sidoo kale waad u safri kartaa meeshaada gaarka ah ee nabada (**Jimicsiga 18 Gaarkeyga, meel nabad oo gaar ah ee Sadarka 3.1.3.**) ama qor jumlo raaxo gelineyso ee gabal yar oo warqad ah oo aad marwalba ku qaadid jeebkaaga, aqrbinta oo dhoor waqtio marka aad u baahantahay. Maxay jumladaan noqon kartaa?



### 3.3.2. Dib u dhaca xasuusaha xun ama sawirada (faragelinta)

Markii afkaaraha ku wareegaan buuraha, waxay inta badan ku shaqo leeyihiiin waxa la soo dhaafay. Qaar ka mid ah xasuusaha way soo laabtaan markale iyo markale. Waqtio noocas, waa muhiim in lagu joojiyo oo loogu ceyriyo, diirad saarida Halkaan iyo Hadeer. Taasi waxay gelisaa iyaga baaxada. Jimicsiyada xigo waxay kugu caawin karaan.

### **Jimicsiga 22: Joojinta afkaarta**

Sida ugu dhaqsiha badan ee aad ogaatid in xasuuusaha iyo dareemaha ka imaanayo waqtiga la soo dhaafay ay qaadaneyso, **sacbahaaga si dhawaq dheer u garaac gacmahaaga** oo dheh “**JOOJI!**” Si dhawaq dheer haddii uusan jirin qof agagaarka ah oo aamusan haddii ay jirto. Qiyaas aastaanta joogsiga ee isgoyska, kaas oo u eg midaan:



Aastaamaha joogsiga nooceee ayaad garaneysaa? Qiyaas aastaanta joogsiga ugu xooga badan ee aad awoodid! Iyada oo la qiyaasayo aastaanta joogsiga, si tartiib ah u neefso, xisaabinta illaa sadex adiga oo gudaha u neefsanayo. Qabo neeftaada hadeer oo xisaab sadex ah. Banaanka u neefso adiga oo xisaabinayo illaa sadex. Ku celi jimicsiga illaa diirad saaridaada si xoogan loo saaro neefsigaaga.

### **Jimicsiga 23: Xisaabinta iyo xujoooyinkooda**


Marka aad bilowdid ka fakerida afkaaraha daran, isku day inaad xalisid dhibaatada Xisaabta xigto, **10,000 laga jaray 13.**

**Laga jaray 13** ka bilow natijada, **ka jarida 13** ee natijadaas, iyo **13 markale** ee natijada. **Ka jar 13 natijadaas**, adiga oo ka saaraya **13 markale**, iyo kadib **13 markale** iyo kadib **ka jar 13 markale** ka bilow natijada ugu dambeysyo, iyo **qaado 13** ka bilow natijadaas.

Haddii aad si sax ah u xisaaabisid, waxaad u imaaneysaa natijada 9883.

Adiga oo ku mashquulsanaa dhibaatada Xisaabta, waxaad ilowday afkaaraha xun. Ka jarida waxay dib u riixeyso iyaga sababtoo ah maanan jirin qolol badan ee maskaxdaada ku jiro.

Ku haynta dhibaatada Xisaabta liis yar ee adiga aad ayaad caawin weyn u heli kartaa. Xojooyinka iyo hal xiraalaha waxay leeyihii saameynada la midka ah. Laga yaabo inaad iibsan kartid joornaalka kaftanka maskaxda ee leh xojooyinka sida midaan:



